**Ogeysiiska nidaamka ilaalinta**

# Xuquuqda Waalidka ee Waxbarashada Gaarka ah K-21

**Xafiiska Xoojinta Fursadaha Ardayga 255**
**Capitol Street NE**
**Salem, Oregon 97310**

Dukumentigaan wuxuu waafaqsan yahay Habka Ogeysiiska Nidaamka Ilaalinta ee Waaxda Waxbarashada Mareykanka
(Juun 2009) oo leh macluumaad gaar ah oo ku saabsan sharciyada Oregon hadba sida loogu baahdo.

Dukumentigaan waxaa loo diyaarinayaa sanad dugsiyeedka 2020-2021. Si kastaba ha noqotee, dokumentigaan wuxuu dhaqan gali doonaa ilaa inta dugsiga degmooyinka laga

ogeysinaayo haddii kale.

Su'aalaha ama faallooyinka ku saabsan dukumentigaan waxaa lagu hagaajin karaa:

Xafiiska Xoojinta Fursadaha Ardayga ee

Waaxda Waxbarashada Oregon

255 Capitol Street

Salem, OR 97310

(503) 947-5634

Dukumentigaan waxaa looga heli karaa si elektaroonig ah mareegta/websaydka Ilaalinta Nidaamsan: https://www.oregon.gov/ode/rules-and-policies/Pages/Procedural-Safeguards.aspx

Waa siyaasadda Guddiga Waxbarashada Gobolka iyo mudnaanta Waaxda Waxbarashada ee Oregon in aysan jiri doonin midabtakoor ama dhibaateyn ku saleysan isirka, midabka, jinsiga, xaaladda guurka, diinta, asalka qaranka, da'da ama naafo ka ahaanshaha barnaamij kasta oo waxbarasho ah, hawlaha, ama shaqada. Dadka qabo su'aalo ku saabsan fursadda loo simanyahay iyo midabtakoor la'aanta waa inay la xiriiraan Kormeeraha Sare ee Waxbarashada Dadweynaha ee Waaxda Waxbarashada Oregon, 255 Capitol Street NE, Salem, Oregon 97310; phone 503-947-5634; fax 503-378-5156.

Macluumaadka buug-yarahaan kujiro waxaa loogu talagalay:

- Waalidiinta haysta carruurta sida lagu qeexay 34 CFR 300.30, kuwaa oo, ama kuwaasoo laga yaabo, inay u-qalmaan adeegyada waxbarashada gaarka ah ee hoos timaada Xeerka Waxbarashada Shakhsiyaadka Naafada ah (IDEA).
- Ardayda qaangaarka ah ee qaba naafonimada ama ilmaha yaryar ee xorta ah sida waafaqsan ORS(Xeerarka Dib Loo Eegay ee Oregon) ORS 419B.550 ilaa 419B.558 iyo OAR 581-015-2325.

## QEEXITAANKA "WAALID"

IDEA waxay siineysaa xuquuq gaar ah waalidiinta haysta carruurta naafada ah. Waalidku wuxuu noqon karaa:

- Waalid dhalay ama soo korsaday canug;
- Waalid soo korsaday canug;
- Masuul sharci ah (aan ahayn hay'ad Dawladeed) ama qof kale oo sharci ahaan mas'uul ka

ah
canuga daryeelkiisa;

- Shaqsi waalid ahaan ku matalaaya waalid ahaan booska waalid dhalay ama soo korsaday ((oo ay ku jiraan awoowe/ayeeyo, adeer/aayo, ama qaraabo kale) oo ilmaha ay la nool yihiin; ama
- Waalid ku-xigeen oo ay magacawday degmada dugsiga ama maxkamadda dhallinyarada.

Haddii in ka badan hal qof uu u-qalmo in uu matalo waalid ahaan, iyo waalidka dhalay ama soo korsaday in uu isku dayaayo inuu u matalo sidii waalidka, waalidka dhalay ama soo korsaday ayaa loo qaadanayaa inuu yahay waalidka marka la eego IDEA. Si kastaba ha noqotee:

- Sharcigaan ma khuseeyo haddii waalidka dhalay ama soo korsaday uusan lahayn awood sharci oo uu ku gaaro go'aamada waxbarashada canuga.
- Haddii uu jiro amar maxkamadeed ama wareegto garsoor oo tilmaamaysa qof (dad) gaar ah oo u matali kara sidii waalidka canuga ama inuu ka gaari karo go'aannada waxbarashada canuga badalkiisa, qofkaasi wuxuu waalid ugu noqon doonaa ujeedooyinka waxbarasho ee gaar ah.

Ardayda gaartay da'da 18 sano, ardayda da'da yar ee habboon ee guursada, ama si sharci ah u xuroobay, oo ana laheen ilaaliye maxkamadeed oo rasmi ah, ayaa ka mas'uul ah inay go'aan ka gaaraan wixii ku saabsan waxbarashadooda gaarka ah. Such students will have all of the IDEA parental rights noted in this publication.

Astaantan waxay tilmaamaysaa agab khuseeya ardayda qaangaarka ah iyo/ama aan qaangaarin.

Ogow taas in xuquuqaha ku jira buug-yarahan ee khuseeya canug waxay sidoo kale khuseeya ardayda waaweyn kuwaa oo u-qalma marka la eego IDEA.

Ma ahan in dhammaan ardayda naafada ah uma qalmaan adeegyada waxbarashada gaarka ah marka la eego IDEA. Ardayda qaar ayaa laga yaabaa inay leeyihiin naafanimo taas oo saameyn ku yeelaneysa hawlaha nolosha ee waaweyn laakiin ma buuxiyaan shuruudaha u-qalmitaanka mid ka mid ah qeybaha naafanimada marka la eego IDEA. Carruurtan waxaa laga yaabaa inay ilaaliyaan sharciyada federaalka ah ee kala duwan, sida Qeybta 504 ee Xeerka Dhaqancelinta ee 1973 ama Xeerka Shaqsiyaadka laxaadka la' ee Mareekanka (ADA). Xuquuqda carruurtaan iyo waalidkooda waa isku mid, laakiin isku si' ma ahan, sida ilaalinta nidaamsan ay ku tilmaantay buug-yarahan. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sharciyadaan, la xiriir iskuduwaha iskuulka degmadaada Qeybta 504 ama ka fiiri macluumaadka yaala Mareegta Xuquuqda Rayidka ee ODE .

## Miiska Tusmooyinka


QEEXITAANKA "WAALID" ....2aad
MACLUUMAADKA GUUD ....5aad
OGEYSIISKA QORAALKA HORE.... aas5
LUUQADDA HOOYO....6aad
BOOSTADA ELEKTORONIGA AH....6aad
QEEXITAANKA – OGGALAANSHAHA....7aad
OGGALAANSHO....7aad
QIIMEYNTA WAXBARASHADA MADAXABANAAN (IEE) ....10aad
QARSOONIDA MACLUUMAADKA ....12aad
QARSOONIDA ....12aad
QEEXITAANADA....12aad
SHAQSI AHAAN LAGU AQOONSAN KARO....12aad
OGEYSIISKA KUSOCDA WAALIDIINTA....12aad
XUQUUQDA HELIDA ....13aad
DIIWAANKA HELITAANKA....14aad
DIIWAANNADA AY KUJIRAAN IN KA BADAN HAL CANUG ....14aad
LIISKA NOOCYADA IYO GOOBAHA MACLUUMAADKA....14aad
KHIDMADAHA ....14aad
CODSIYADA IN WAX LAGA BADALO DIIWAANNADA ....14aad
FURSADA IYO NIDAAMKA DHAGEYSIGA EE KU SAABSAN DIIWAANNADA WAXBARASHADA ....15aad
NATIIJOOYINKA DHAGEYSIGA EE KU SAABSAN DIIWAANNADA WAXBARASHADA....15aad
OGOLAANSHAHA SHAACINTA MACLUUMAADKA SHAQSIGA LAGU AQOONSAN KARO ....15aad
ILAALINTA ....16aad
BURBURINTA MACLUUMAADKA ....16aad
XALINTA KHILAAFAADKA....16aad
DHEXDHEXAADINTA....16aad
FARQIGA U DHEXEEYA NIDAAMYADA CABASHOOYINKA XAQSOORKA IYO DHAGEYSIGA IYO CABASHOOYINKA GOBALKA ....17aad
NIDAAMYADA CABASHADA GOBOLKA....18aad
GUDBINTA CABASHADA GOBOLKA ....20aad
GUDBINTA CODSIGA CABASHAD HANNAANKA XAQSOOR ....21aad
FOOMAMKA TUSAALAHA....23aad
MEELAYNTA CANUGA INTA CABASHADA HANNAANKA XAQSOORKA IYO DHAGEYSIGANA WAA LA SUGAAYO ....23aad
HANNAANKA XALINTA ....24aad
DHAGEYSIGA HANNAANKA XAQSOORKA EEX LA'AANTA AH ....26aad
XUQUUQDA DHAGEYSIGA....27aad
GO'AAMADA DHAGEYSIGA ....27aad
JADWAL-WAQTIYEEDKA IYO SAHLANAANTA DHAGEYSIGA; DHAMMAANSHAHA GO'AANKA....28aad
TALLAABOOYINKA MADANIGA AH, OO AY KUJIRTO MUDADA WAQTIGA EE LA GUDBINAAYO TALLAABOOYINKAAS ....29aad
KHIDMADAHA QAREENKA....30aad
NIDAAMYADA MARKA LA EDBINAAYO CARRUURTA NAAFADA AH ....32aad

AWOODA SHAQAALAHA DUGSIGA ....................................................32aad
ADEEGYADA ....................................................32aad
GO'AANKA MUUJINTA....................................................33aad
BEDDELKA MEELAYNTA KA SAARIDA EDBINTA SABABTEEDA ....................................................35aad
GO'AANSASHADA GOOBTA....................................................35aad
RACFAAN....................................................35aad
MEELAYNTA XILIGA RAFCAANKA LAGU JIRO....................................................36aad
ILAALINTA CARRUURTA AAN WELI U QALMIN FOR WAXBARASHADA GAARKA IYO ADEEGYADA LA XIRIIRA ....................................................36aad
U GUDBINTA IYO WAXKAQABASHADA EE FULINTA SHARCIGA IYO MAAMULKA GARSOORKA ....................................................38aad
SHURUUDAHA MEELEYNTA HALKA DHINAC AH EE WAALIDIINTA HAYSTA CARUURTA DHIGATA DUGSIYADA GAARKA AH OO KUDHIGTA KHARASHKA DADWEYNAHA....................................................39aad

## MACLUUMAADKA GUUD

Xeerka Waxbarashada ee Shaqsiga Naafada ah (IDEA), sharciga federaalka ee khuseeya waxbarashada ardayda naafada ah, waxay u baahantahay in dugsiyada siiyaan waalidiinta haysta canug naafada ah oo leh ogeysiis ay ku jirto sharraxaad buuxda oo ku saabsan ilaalinta nidaamsan ee laga heli karo IDEA iyo
Sharciyada Waaxda Waxbarashada ee Mareykanka. Nuqulka kamid ah ogeysiiskaan waa in la siiyaa waalidiinta ugu yaraan hal mar sannad dugsiyeedka, waana in nuqul la siiyaa waalidiinta: (1) markii gudbinta bilowga ah ama codsiga waalidka ee qiimeynta; (2) markii la helo cabashada ugu horreysa ee waxbarashada gaarka ah ee Gobolka sida ku xusan 34 CFR 300.151 ilaa 300.153 (OAR 581-015-2030) iyo markii la helo codsiga dhegaysiga dacwadda ugu horreysa sida ku xusan 300.507 (OAR 581-015-2345) sannad dugsiyeedka dhexdiisa; (3) marka la gaaro go'aan laga qaadayo talaabo edbin oo ka dhan ah canugaaga taas oo ka dhigan bedelida meeleynta; Iyo (4) markii aad codsato.

Dhammaan xuquuqaha ku jira dukumentigaan waxay la xiriiraan Qeybta B ee IDEA. Qeybta B waxaa kamid ah carruurta da'doodu tahay saddex jir (3) ilaa labaatan iyo kow jir (21). ODE waxay sidoo kale daabacdaa ilaalinta ogeysiisyada nidaamsan ee carruurta da'dooda dhalashada – shan (5) ee Barnaamijyada Waxkaqabashada Hore/Waxbarashada Gaarka ah ee Carruurnimada Hore (EI/ECSE).

Ogeysiiskaan Ilaalinta Nidaamsan wuxuu sidoo kale khuseeyaa waalidiinta carruurtooda naafada ah ay dhigtaan dugsi kasta oo dowladda/Jaatarka Oregon. Sida waafaqsan sharciga Oregon, degmada uu ku yaalo dugsiga dowladda/jaatarka ayaa mas'uul ka ah waxbarashada gaarka ah.

## OGEYSIISKA HORE EE QORAN

### Ogeysiis

Degmada dugsigaaga waa inay ku siisaa ogeysiis qoran (ku siisaa macluumaad gaar oo qoraal ah), waqti macquul ah gudihiisa kahor inta:

1. Aysan soo jeedin in la bilaabo ama la beddelo aqoonsiga, qiimeynta, ama meelaynta waxbarashada canugaaga, ama siinta waxbarashada dadweynaha lacag la'aanta ah ee habboon (FAPE) canugaaga; **ama**
2. Ay diidaan inay bilaabaan ama ay beddelaan aqoonsiga, qiimeynta, ama meelaynta waxbarashada canugaaga, ama siinta FAPE canugaaga.

### Tusmadda ogeysiiska

Ogeysiiska qoran waa inuu:

1. Qeexaa tallaabada degmada dugsigaaga ay soo jeedisay ama ay diiday inay qaado;
2. Sharaxaa sababta degmada dugsigaaga ay u soo jeedinayso ama ay u diideyso inay qaaddo tallaabada;
3. Qeexaa nidaamka qiimeyn kasta, falanqeynta, diiwaanka, ama warbixinta degmada dugsigaaga uu u adeegsaday inuu ku go'aansado soo jeedinta ama diidmada tallaabada;

4. Ku daraa bayaan ah inaad haysato ilaalin hoos timaada shuruudaha ilaalinta nidaamsan ee qeybta B ee IDEA;
5. Kuu sheegaa sidaad ku heli karto nuqul ka mid ah Ogeysiiska nidaamka ilaalinta haddii tan kadib markaa degmada dugsigaaga ay soo jeedinayso ama ay diideyso ma ahan gudbinta bilowga ah ee qiimeynta;
6. Ku daraa agabyo si aad ula xiriirto si lagaaga caawiyo inaad fahamto IDEA;
**7.** Qeexaa xulashooyinka kale ee kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiyeed (IEP) ay tixgelisay iyo sababaha loo diiday xulashooyinkaas; **iyo**
8. Bixiyaa sharraxaad ku aadan arrimaha kale ee la xiriira soo jeedinta ama diidmada degmada dugsiga.

**Ogeysiiska ku qoran luqad la fahmi karo**

Ogeysiiska waa inuu ahaadaa:

**1.** Mid ku qoran luuqad ay fahmi karaan dadweynaha guud; **iyo**
2. Mid lagu bixiyo afkaaga hooyo ama qaababka kale ee isgaarsiineed ee aad isticmaasho, haddii aysan si cad macquul u ahayn in sidaas la sameeyo.

Haddii afkaaga hooyo ama qaababka kale ee isgaarsiinta uusan ahayn luqad qoran, degmada dugsigaaga waa inay xaqiijisaa in:

1. Ogeysiiska adiga laguugu tarjumay hadal ahaan siyaabo kale oo afkaaga hooyo ah ama qaab kale oo isgaarsiineed;
**2.** Aad fahantay nuxurka ogeysiiska; **iyo**
3. Ay jirto caddeyn qoran oo ah in 1aad iyo 2aad kor ku xusan la buuxiyey.

## LUQADDA HOOYO

*Luqadda hooyo,* when used with an individual who has limited English proficiency, means the following:

1. Luqadda uu caadi ahaan u isticmaalo qofkaas, ama, marka laga hadlayo canug, luqadda ay sida caadiga ah u isticmaalaan canuga waalidkiisa;
2. Dhammaan xiriirrada tooska ah ee canuga (oo ay ku jiraan qiimeynta canuga), luqadda uu caadi ahaan canuga ugu isticmaalo guriga ama deegaanka waxbarashada.

Qofka dhegaha la' ama indhaha la', ama qofka aan lahayn luuqad qoran, qaabka isgaarsiinta waa waxa uu qofka caadi ahaan u isticmaalo (sida luqadda calaamadaha/dhegoolaha, Farta indhoolaha, ama isgaarsiinta hadal ahaanta ah).

## BOOSTADA ELEKTOROONIGA AH

Haddii degmada dugsigaaga ay siiso waalidiinta ikhtiyaarka ah inay ku helaan dokumentiyada iimayl ahaan, waxaad dooran kartaa inaad ku hesho emayl ahaan kuwaan soo socda:

1. Ogeysiiska qoraalka hore;
2. Ogeysiiskaan Nidaamka Ilaalinta; **<u>iyo</u>**
3. 3. Ogeysiisyada la xiriira cabashada nidaamka dhawrista.

**QEEXITAANKA – OGGALAANSHAHA**

**Qeexitaanka**

*Oggolaansha waxaa loola jeeda*:

1. In si buuxda lagugu wargeliyay luuqaddaada hooyo ama qaab kale oo isgaarsiineed (sida luqadda dhegoolaha, Farta indhoolaha, ama isgaarsiinta hadal ahaanta ah) dhammaan macluumaadka ku saabsan tallaabada aad siineyso oggolaanshaha.
2. Waxaad fahantay oodna oggolaatay qoraal ahaan tallaabadaas, oggolaanshahana wuxuu qeexayaa tallaabadaas wuxuuna qoraaya diiwaannada (haddii ay jiraan) taas oo la siidayn doono iyo cidda; **<u>iyo</u>**
3. Waxaad fahamsan tahay in oggolaanshuhu uu yahay ikhtiyaar dhinacaaga ah oo waadna ka bixi kartaa oggolaanshahaaga wakhti kasta.

**Ka noqoshada Ogolaanshaha** - Haddii aad rabto inaad ka baxdo (noqoto) oggolaanshahaaga kadib marka canugaaga bilaabo helitaanka waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, waa inaad sidaas ku samaysaa qoraal ahaan. Ka noqoshadaada oggolaanshaha ma burineyso (celineyso) ficil dhacay kadib markii aad bixisay oggolaanshahaaga laakiin kahor inta aadan ka noqonin. Intaa waxaa dheer, dugsiga degmada loogama baahna inuu wax ka hagaajiyo (beddelo) diiwaannada waxbarashada canugaaga si meesha looga saaro wixii tixraacyo ah ee canugaaga ka helay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira kadib kanoqoshada oggolaanshahaaga.

**OGGOLAANSHO**

Xusuusnow qodobbada oggolaanshaha ee hoos ku xusan ayaa sidoo kale quseeya ardayda qaangaarka ah iyo kuwa aan qaangaarin.

**Oggolaanshaha qiimeynta bilowga ah**

Dugsiga degmadaada ma sameyn karo qiimeynta bilowga ah ee canugaaga si loo go'aamiyo haddii canugaaga uu u-qalmo Qeybta B ee IDEA si uu u helo waxbarashada gaar ah iyo adeegyada la xiriira iyada oo aan marka hore lagu siin ogaysiis hore oo qoraal ah oo ku saabsan tallaabada la soo jeediyay iyo helitaanka oggolaanshahaaga sida lagu sharraxay hoosta cinwaanada**Ogeysiiska Qoraalka Hore** iyo **Oggolaanshaha**.

Degmada dugsigaaga waa inay sameysaa dadaal macquul ah si ay u hesho oggolaanshahaaga la wargeliyey ee qiimeynta bilowga ah si loo go'aamiyo haddii canugaaga yahay canug naafo ah.

Oggolaanshahaaga qiimeynta bilowga ah micnaheedu ma aha in aad sidoo kale bixisay oggolaanshahaaga ee loogu talagalay degmada dugsiga si ay u bilawdo bixinta waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira canugaaga.

Degmada dugsigaaga ayaa laga yaabaa inaysan u adeegsan diidmadaada in ay u oggolaato hal

adeeg ama hawl oo la xiriirta qiimeynta bilowga ah ee saldhiga u ah u diiditaanka adiga ama canugaaga adeeg kaloo kasta, faa'ido, ama hawl, ilaa laga reebo shuruud kale oo Qeybta B ugu baahan dugsiga degmada inuu sidaa sameeyo.

Haddii canugaaga ka diiwaangashan yahay dugsiga dadweynaha ama aad raadineyso inaad canugaaga ka diiwaangaliso dugsiga dadweynaha oo aadna diidday oggolaansho ama aadan ka soo jawaabin codsi ah inaad bixiso oggolaanshaha qiimeynta bilowga ah, waxaa laga yaabaa inay dugsiga degmadaada, laakiin aan loo baahneyn, raadi inaad sameyso qiimeynta bilowga ah ee canugaaga adiga oo adeegsanaya dhexdhexaadinta IDEA ama nidaamka dhawrista cabashada, kulanka xallinta, iyo nidaamyada dhageysiga xaqsoorka eex la'aanta ah. Degmada dugsigaaga ma ku xadgudbi doonto waajibaadkeeda ah in la ogaado, la aqoonsado oona la qiimeeyo canugaaga haddii aysan raacin qiimeynta canugaaga xaaladahaas dhexdooda.

**Sharciyada khaaska ah ee loogu talagalay qiimeynta bilowga ah ee ilmaha ay koriso waaxda gobolka**

Haddii canuga yahay ilmaha ay koriso dawladda oo uusan la noolayn waalid, degmada dugsiga uma baahna oggolaanshaha waalidka loogu talagalay qiimeynta bilowga ah si loo go'aamiyo haddii canugu yahay canug naafo ah haddii:

1. In kastoo ay jiraan dedaal macquul ah si loo sameeyo arrintaas, haddana degmada dugsiga ma heli karto canuga waalidkiisa;
2. Xuquuqda waalidiinta la joojiyay si waafaqsan sharciga gobolka; **ama**
3. Garsoore u xilsaaray si uu u gaaro go'aanada xaqa waxbarashada iyo si uu u oggolaado qiimeynta bilowga ah ee shaqsi aan ka ahayn waalidka.

*Ilmaha ay koriso waaxda gobolka*, sida loogu isticmaalay IDEA, waxaa loola jeedaa canug kaas, sida uu go'aamiyey gobolka uu canugu ku nool yahay, waa:

1. Canug lasoo korsaday;
2. Loo tixgeliyo ilmo ay koriso waaxda gobolka sida waafaqsan sharciga gobolka; **ama**
3. Kujiro gacanta hay'adda daryeelka carruurta dadweynaha.

Waxaa jira hal mar oo laga soo reebo oo ay tahay inaad ogaato. *Ilmaha ay koriso waaxda gobolka* kuma jiro canug la korsaday oo leh waalid korsaday kaas oo buuxiyay qeexitaanka *waalidka* sida loogu isticmaalay IDEA.

Oregon dhexdeeda, ilmaha ay koriso waaxda gobolka waa canug si ku meel gaar ah ama si joogto ah ugu jira gacanta, ama ay ka go'an tahay, Waaxda Adeegyada Aadanaha ama Maamulka Dhalinyarada Oregon iyada oo loo marayo tallaabada maxkamadda dhalinyarada.

**Ogolaanshaha waalidka ee adeegyada**

Degmada dugsigaaga waa inay heshaa oggolaanshahaaga xog-ogaalka ah kahor inta aysan siinin waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira canugaaga marka ugu horreysay.

Degmada dugsiga waa inay sameysaa dadaal macquul ah si ay u hesho oggolaanshahaaga xog-ogaalka ah kahor inta aysan siin waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira canugaaga markii ugu horreysay.

Haddii aadan ka soo jawaabin codsiga ah inaad bixiso oggolaanshahaaga si ilmahaaga u helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira markii ugu horreysay, ama haddii aad diido inaad bixiso oggolaanshaha noocaas ah ama dib dambe ugu baxdo (noqoto) oggolaanshahaaga si qoraal ah, degmada dugsigaaga ma isticmaali karto ilaalinta nidaamka (tusaale ahaan, dhexdhexaadinta, nidaamka dhawrista cabashada, kulanka xallinta, ama dhageysiga dacwadda eex la'aanta ah) si loo helo heshiis ama xukun ah in waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira (ay ku taliyaan Kooxda IEP-ga canugaaga) ee la siin karo canugaaga oggolaanshahaaga la'aantiisa.

Haddii aad diido inaad bixiso oggolaanshahaaga si canugaaga u helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira markii ugu horreysay, ama haddii aadan ka soo jawaabin codsiga ah inaad bixiso oggolaanshahaas ama aad ka noqoto hadhow (buriso) oggolaanshahaaga oo qoraal ah isla markaana degmada aysan ilmahaaga siinin waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira taas oo ay ku doonaysay oggolaanshahaaga, degmada dugsigaaga:

1. Ma ahan ku xadgudubka sharcigii ahaa in canugaaga loo sameeyo waxbarashada bilaashka ee habboon ee dadweynaha (FAPE) maadaama ay ku guuldaraysatay inay adeegyadaas siiso canugaaga; **<u>iyo</u>**
2. Looma baahna in la yeesho kulanka barnaamijka waxbarashada shaqsiga ah (IEP) ama loo sameeyo IEP canugaaga ee loogu talagalay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira kuwaas oo oggolaanshahaaga lagaa codsaday.

Haddii aad ka noqoto (buriso) oggolaanshahaaga si qoraal ah mar kasta kadib marka canugaaga marka hore la siiyo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada waxbarashada la xiriira, markaa kadib dugsiga degmada ayaa laga yaabaa in uusan sii wadin bixinta adeegyadan, laakiin waa inuu ku siiyaa ogeysiis qoraal hore, sida lagu qeexay hoosta cinwaanka ***Ogeysiiska Qoraalka Hore***, kahor intaan la joojin adeegyadaas.

**Ogolaanshaha waalidka ee dib u qiimeynta**

Degmada dugsigaaga waa inuu helaa xog-ogaalka ogolaanshahaaga kahor inta aan dib loo qiimeynin cunugaaga, ilaa mooyee in degmada dugsigaaga muujiso inay:

1. Qaadey talaabooyin macquul ah si loo helo ogolaanshahaaga si dib loogu qiimeeyo; **<u>iyo</u>**
2. In aadan ka jawaabin.

Sharciga Oregon wuxuu u baahanyahay oggolaanshaha xog-ogaalka oo qoraal ah ooo loogu talagalay imtixaan kasta oo shaqsiga sirdoonka ah ama tijaabinta shakhsiyadda; marka laga reebo oggolaanshuhu ma khuseeyo marka la codsanaayo oggolaanshaha mid ka mid ah qiimeyntaan.

Hadii aad diidid inaad ogolaatid dib u qiimeynta cunugaaga, degmada dugsi ayaa laga yaabaa, laakiin waajib kuma aha, iney sii wadaan howsha dib u qiimeynta iyada oo la isticmaalaayo dhexdhexaadin, nidaamka xuquuq dhowrista cabashada, kulanka xallinta, habka dhageysiga nidaamka cadaalada eex la'aanta ah, si aad u raadiso inaad meesha ka saarto diidmadaada oo aad oggolaato dib u qiimeynta canugaaga. Sida qiimayntii hore, degmada dugsigaagu kuma xadgudbayo waajibaadkeeda sida ku cad Qeybta B ee IDEA haddii ay diido inay dib u qiimeynta ku sameyso qabkaan.

**Dukumentiga dadaallada macquulka ah si loo helo oggolaansho**

Dugsigaaga waa inuu diiwaangeliyaa isku-daygiisa inuu helo oggolaanshahaaga qiimeynta hore, inuu bixiyo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira markii ugu horreysay, dib u qiimeynta, iyo in loo meeleeyo waalidiinta ee ilmaha ay koriyaan/xanaaneeyaan waaxaha gobolka loogu talagalay qiimeynta hore. Dukumentiyada waa inay ku jiraan diiwaanka iskudayada degmada dugsiga ee goobtaan dhexdeeda, sida:

1. Diiwaanada faahfaahsan ee wicitaannada taleefanka la sameeyey ama la iskudayay iyo natiijooyinka wicitaannadaas;
2. Nuqulada waraaqaha loo diray waalidiinta iyo wixii jawaabo ah oo laga helay; **<u>iyo</u>**
3. Diiwaanada faahfaahsan ee booqashooyinka lagu tagay guriga waalidka ama goobta shaqada iyo natiijooyinka booqashooyinkaas.

**Shuruudaha kale ee oggolaanshaha**

Ogolaanshahaaga looma baahna kahor inta degmaada dugsigaaga ayaaa lagaa yaaba:

1. Inay dib u eegaan xogta jirta mid qeyb ka ah qiimeynta canugaaga ama dib u qiimeynta;
2. In ay canugaaga siiyaan imtixaan ama qiimeyn kale oo la siiyo dhammaan carruurta hadaysan, kahor imxitixaankaas ama qiimeyntaas, oggolaansho looga baahanyahay dhammaan waalidiinta carruurta;

Haddii aad ilmahaaga ka diiwaangelisay dugsi gaar loo leeyahay oo aad adigu kharashka iska bixisay ama haddii aad ilmahaaga dugsi-xaafadeed u dhigto, oo aadan bixin oggolaanshahaaga qiimeynta hore ee loogu talagalay canugaaga ama dib u qiimaynta canugaaga, ama aad ku guul daraysatay inaad kasoo jawaabto codsiga ah inaad bixiso oggolaanshahaaga, degmada dugsiga ma isticmaali karto nidaamyada ka noqoshada oggolaanshaha (tusaale ahaan, dhexdhexaadin, nidaamka dhageysiga dacwadda eex la'aanta ah) loomana baahna in loo tixgeliyo canugaaaga inuu u qalmo inuu helo adeegyada loo siman yahay (adeegyada loo diyaariyey qaar ka mid ah carruurta naafada ah ee dugsiga gaarka ah waalidku u meeleeyay).

## Oggolaanshaha loogu talagalay Isticmaalka Faa'idada Dadweynaha iyo Caymiska (sida Medicaid)

Degmada dugsiga waa inay sameysaa ooyna hirgelisaa nidaamyada si loo hubiyo in diidmadaada inaad oggolaato mid kasta oo ka mid ah adeegyadan kale iyo hawlaha in aysan sababeynin guuldarro inaad canugaaga siiso waxbarashada dadweynaha lacag la'aanta ah ee habboon (FAPE).

Sidoo kale, Degmada dugsigaaga ayaa laga yaabaa inaysan u adeegsan diidmadaada in ay u oggolaato hal kamid ah adeegyadaan ama hawlahaan oo la xiriirta qiimeynta bilowga ah ee saldhiga u ah u diiditaanka adiga ama canugaaga adeeg kaloo kasta, faa'ido, ama hawl, ilaa laga reebo shuruud kale oo Qeybta B ugu baahan dugsiga degmada inuu sidaa sameeyo.

Waad ka noqon kartaa oggolaanshaha waqti kasta adiga oo ogaysiinaaya degmada dugsiga qoraal ahaan. Haddii aad ka noqoto oggolaanshahaaga, canugaaga weli wuxuu heli doonaa

waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee loo baahanyahay si loo bixiyo FAPE.

## QIIMEYNTA WAXBARASHADA MADAXABANAAN (IEE)

### Guud

Sida hoos lagu sharaxay, waxaad xaq u leedahay inaad hesho qiimeynta waxbarashada madaxabannaan (IEE) ee canugaaga haddii aadan ku raacsaneyn qiimeynta canugaaga taas oo ay heshay degmada dugsigaaga.

Haddii aad codsato IEE, degmada dugsiga waa inay ku siisaa macluumaad ku saabsan halka aad ka heli karto IEE iyo wax ku saabsan halbeegyada degmada dugsiga ee khuseeya qiimeynta waxbarashada ee madaxabannaan.

### Qeexitaanada

*Qiimeynta waxbarashada madaxabanaan* waxaa loola jeedaqiimeynta uu sameeyay imtixaan qaade ku xeeldheer oo aan u shaqeyneynin dugsiga degmada ee masuulka ka ah waxbarashada canugaaga.

*Kharashka dadweynaha* waxaa loola jeedaa in mar uun ay degmada dugsiga wada bixiso kharashka qiimeynta ama ay xaqiijiso in qiimeynta haddii kale lagugu siiyay si bilaash ah. waafaqsanaanta qodobbada Qeybta B ee IDEA, taas oo u oggolaaneysa gobol kasta inuu adeegsado gobolkuu rabo hanoqdee, deegaanka, federaalka iyo ilaha taageerada gaarka ah ee laga heli karo gobolka si loo buuxiyo shuruudaha Qeybta B ee Xeerka.

### Xaqa qiimeynta kharashka dadweynaha

Waxaad xaq u leedahay qiimeynta  waxbarashada madaxabannaan ee canugaaga oo ah kharash dadweynaha haddii aadan ku raacsanayn qiimeynta canugaaga oo ay heshay degmada dugsigaaga, iyada oo la raacayo shuruudaha soo socda:

1. Haddii aad codsato qiimeynta waxbarashada madaxabannaan ee canugaaga oo kharash dadweynaha ah, waa in degmada dugsigaaga, iyada oo aan la sameeynin dib u dhac aan loo baahnayn, <u>midkoodna</u>: (a) Soo gudbiso/xareyso cabashada nidaamka dhawrista si loo muujiyo in qiimeynta canugaagu ay tahay mid habboon; ama (b) Bixi qiimeynta waxbarashada madaxabannaan oo ay ku bixiso kharashka dadweynaha, ilaa in ay degmada dugsiga ku muujiso dhageysiga in qiimeynta canugaaga ee aad heshay aysan buuxinin shuruudihii dugsiga degmada.
2. Haddii degmada dugsigaagu codsado dhageysiga dacwada iyo go'aanka kama dambeysta ah uu yahay in qiimeynta degmada dugsigaaga ee canugaaga ay tahay mid habboon, waxaad weli xaq u leedahay qiimeynta waxbarashada madaxabannaan, laakiin maaha mid lagu bixiyo kharash dadweynaha.
3. Haddii aad codsato qiimeynta waxbarashada madaxabannaan ee canugaaga, degmada dugsiga waxay ku weydiin kartaa sababta aad u diidantahay qiimeynta canugaaga oo ay heshay degmada dugsigaaga. Si kastaba ha noqotee, degmada dugsigaaga ayaa laga yaabaa inaysan u baahnayn sharraxaada oo laga yaabo in aysan si aan macquul ahayn dib ugu dhigin midkood bixinta qiimeynta waxbarashada madaxabannaan ee canugaaga oo lagu bixiyo kharashka dadweynaha ama xareysashada nidaamka xuquuq dhawrista cabashada si loo difaaco qiimeynta degmada dugsiga ee canugaaga.

Waxaad xaq u leedahay hal mar oo kaliya qiimeynta waxbarashada madaxabannaan ee canugaaga oo lagu bixiyo kharashka dadweynaha mar kasta oo degmada dugsigaaga sameyso qiimeynta canugaaga oo aad diidantahay.

**Qiimeynta ay waalidku bilaabeen**

Haddii  hesho qiimeynta waxbarashada madaxabannaan ee canugaaga oo lagu bixiyo kharashka dadweynaha ama aad la wadaagto degmada dugsiga qiimeynta canugaaga oo aad ku heshay kharash gaar ah:

1. Degmada dugsigaaga waa inay tixgelisaa natiijooyinka qiimeynta canugaaga, haddii ay buuxiso shuruudaha dugsiga degmada ee qiimeynta waxbarashada madaxabannaan, go'aan kasta oo la gaaro marka la eego siinta waxbarashada dadweynaha ee ku habboon oo bilaashka ah (FAPE) canugaaga; **ama**
2. Adiga ama degmada dugsigaaga ayaa u soo bandhigi kara qiimeynta caddeyn ahaan marka la joogo nidaamka dhageysiga dacwadda ee ku aadan canugaaga.

Marka laga reebo shuruudaha kor lagu soo sharraxay, degmada dugsiga ma soo rogi karto shuruudo ama waqtiyo la xiriira helitaanka qiimeynta waxbarashada madaxabannaan oo lagu bixiyo kharashka dadweynaha.

## QARSOONIDA MACLUUMAADKA

### QEEXITAANADA

### QARSOONIDA

Sida lagu isticmaalay hoosta cinwaanka **Qarsoodinida Macluumaadka**:

- *Burburinta* waxaa loola jeedaa burburinta muuqato ama ka saarida aqoonsiga shaqsiyeed oo ka yimaada macluumaadka si markaas macluumaadka uusan u noqonin wax shaqsi ahaan lagu aqoonsan karo.
- *Diiwaanada waxbarashada* waxaa loola jeedaa nooca diiwaanada ee an kusoo qaadanay hoosta qeexitaanka ‘‘diiwaanada waxbarashada’’ gudaha 34 CFR Qeybta 99 (xeerarka dhaqangelinaya Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Xeerka Qarsoonida ee 1974, 20 U.S.C. § 1232g (FERPA)) iyo OAR 581-015-2300.
- *Hay'ada kaqeybgaleysa* waxaa loola jeedaa degmada dugsiga kasta, Hay'ada kaqeybgaleys degmada dugsiga kasta, hay'ad ama urur kasta oo ururisa, keedisa, ama adeegsata macluumaadka shaqsiga lagu garan karo, ama macluumaadka laga helo, sida ku cad Qeybta B ee IDEA.

### SHAQSI AHAAN LAGU GARAN KARO

*Shaqsi ahaan lagu garan karo* waxaa loola jeedaa waa macluumaad ay ku jiraan:

(a) Magaca canugaaga, magacaaga waalidka ahaan, ama magaca xubin kale oo qoyska ka mid ah;

(b) Cinwaanka canugaaga;

(c) Aqoonsiga shaqsiyeed, sida lambarka amniga bulshada ee canugaaga, lambarka ardayga, ama lambarka bayometrika/faraha;

(d) Aqoonsiyada kale ee aan tooska ahayn, sida taariikhda dhalashada canuga, goobta dhalashada, iyo magaca aabaha hooyada;

(e) Macluumaad kale oo keligiis ama isku jira oo ku xiran ama ku xirmi kara canug gaar ah oo u oggolaan kara qof macquul ah oo ka tirsan bulshada dugsiga, kaas oo aan aqoon shakhsiyeed u lahayn xaaladaha ku habboon, si loo garto canug hubaal macquul ah leh; ama

(f) Macluumaad kale oo uu codsaday qof ay degmada dugsiga si cad u aaminsan yahay in uu ogyahay aqoonsiga ardayga ay diiwaanka waxbarashadu la xiriirto.

## OGEYSIISKA KU SOCDA WAALIDIINTA

SEA waa inay bixisaa ogeysiis ku filan inay si buuxda u wargeliso waalidiinta wax ku saabsan qarsoodinida macluumaadka shaqsi ahaan lagu aqoonsan karo, oo ay ka mid yihiin:

1. Sharaxaada ilaa xadka ogeysiiska lagu bixiyo luuqadaha hooyo ee kooxaha dadweynaha kala duwan ee gobolka;
2. Faahfaahinta carruurta laga hayo macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo, noocyada macluumaadka la raadinaayo, hababka gobolku damacsan yahay inuu u adeegsado ururinta macluumaadka (oo ay ku jiraan ilaha xogta laga soo ururiyey), iyo isticmaalka loo sameynaayo macluumaadka;
3. Soo-koobidda xeerarka iyo nidaamyada in hay'adaha kaqeybgalayaa ay waajib tahay in ay raacaan oo ku saabsan keydinta, u shaacinta xisbiyada saddexaad, haynta, iyo burburinta macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo; **iyo**
4. Dhammaan sharaxaada xuquuqda waalidka iyo carruurta ee ku saabsan macluumaadkaan, oo ay ku jiraan xuquuqda hoos timaada Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodinida (FERPA) iyo shuruudihiisa hirgelinta ee 34 CFR Qeybta 99.

Kahor hawl kasta oo weyn oo lagu garto, lagu helo, ama lagu qiimeeyo carruurta u baahan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira (sidoo kale loo yaqaano “kawarqabka canuga”), ogeysiiska waa in lagu daabaco ama lagu shaaciyaa wargeysyada ama warbaahinta kale, ama labadaba, iyada oo leh wareegga ku filan si loo ogeysiiyo dhammaan waalidiinta gobolka ee hawlahaas.

## XUQUUQDA HELIDA

Hay'ada[1] kaqeybgaleysa waa inay kuu oggolaataa inaad baarto oo aad dib u eegto wixii diiwaanada waxbarashada ah ee la xiriira canugaaga kuwaaa oo la ururiyay, la xafiday, ama ay

isticmaashay degmada dugsigaaga sida ku cad qeybta B ee IDEA. Hay'ada[1] kaqeybgaleysa waa inay u hoggaansantaa codsigaaga si loo baaro oona dib loogu eego wixii diiwaanada waxbarashada ah ee canugaaga iyadoo aan dib u dhac loo baahnayn iyo kahor kulan kasta oo ku saabsan barnaamijka waxbarashada shaqsiyeed (IEP), ama nidaamka dhageysiga xaqsoorka dhexdhexaadka ah oo kasta (oo ay ku jiraan kulanka xallinta ama dhageysiga la xiriirta anshaxa), oo sinaba aan ka badnayn 45 maalmood oo kalendharka ah ka dib markaad samaysay codsiga.

Xaqa aad u leedahay inaad baarto oo aadna dib u eegto diiwaanada waxbarashada waxaa ka mid ah:

1. Xaqa aad u leedahay jawaabta ka timaadda hay'ada kaqeybgaleysa ee degmada codsiyadaada macquulka ah ee loogu talagalay sharraxaadda iyo fasiraadda diiwaanada;
2. Xaqa aad u leedahay inaad ka codsato in hay'adda kaqeybgaleysa ay siiso nuqulada diiwaanka haddii aadan si fiican u baari karin oo aadna dib u eegi karin diiwaannada haddii aadan helin nuqulladaas; **<u>iyo</u>**
3. Xaqa aad u leedahay in wakiilkaaga kuu baaro oo uuna dib kugu eego diiwaanada.

---

[1] Waaxda Waxbarashada ee Maraykanku waxay u adeegsataa erayga "*hay'ada kaqeybgaleysa"* oo ay kala jeedo degmada dugsiga kasta, hay'ad, ama wakaalada ururisa, xafida, ama adeegsata macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo ama macluumaadka laga soo helo sida ku cad Qeybta B ee IDEA. Sababtoo ah dokumentigan wuxuu diiradda saarayaa ku lug lahaanshaha waalidka ee deegaanka degmada dugsiga, "degmada dugsiga" ayaa loo adeegsadaa halkii laga isticmaali lahaa ereyga weyn, "hay'ada kaqeybgaleysa;" si kastaba ha noqotee, sharciyada diiwaanada ee lagaga hadlay qeybtan ayaa khuseeya dhammaan hay'adaha kaqeybgalaaya.

Hay'ada kaqeybgaleysa ayaa laga yaabaa inay u malayso inaad leedahay awood aad ku baarto oo aadna dib ugu eegto diiwaanada la xiriira canugaaga haddii aan lagu talin in aadan awood u lahayn sida ku cad sharciga xukuma gobolka ee khuseeya arrimaha sida mas'uuliyadda, kala tagga, iyo furiinka.

## DIIWAANKA HELITAANKA

Hay'ad kasta oo kaqeybgaleysa waa inay haysaa diiwaanka xisbiyada helaya helitaanka diiwaanada waxbarashada lasoo aruuriyay, la keediyey, ama loo isticmaalay si waafaqsan Qeybta B ee IDEA (marka laga reebo helitaanka waalidiinta iyo shaqaalaha idman ee wakaaladda kaqeybgaleysa), oo ay ku jiraan magaca xisbiga, taariikhda gelitaanka la siiyey, iyo ujeeddada loogu oggolaaday xisbiga inuu isticmaalo diiwaannada.

## DIIWAANADA AY KUJIRAAN IN KA BADAN HAL CANUG

Haddii diiwaan kasta oo waxbarasho ay ku jiraan macluumaadka ku saabsan in ka badan hal canug, waalidiinta carruurtaas waxay xaq u leeyihiin inay baaraan oo ayna dib u eegaan kaliya macluumaadka la xiriira canugooda ama lagu wargeliyo macluumaadkaas gaarka ah.

## LIISKA NOOCYADA IYO GOOBAHA MACLUUMAADKA

Marka la codsado, hay'ada kaqaybgaleyso waa inay ku siisaa liiska noocyada iyo goobaha diiwaanada waxbarashada la ururiyey, la xafiday, ama ay isticmaasho hay'ada.

## KHIDMADAHA

Hay'ad kasta oo kaqeybgaleysa ayaa laga yaabaa inay ujro kaaga qaadato nuqullada diiwaanada ee adiga laguu sameeyay sida ku cad Qeybta B ee IDEA, haddii ujrada aysan si wax ku ool ah kaaga hor istaageyn inaad isticmaasho xuquuqdaada inaad baartid oo aadna dib u eegto diiwaannadaas.

Hay'ada kaqeybgaleysa ayaa laga yaabaa inaysan wax lacag ah kaa qaadinin si ay u raadiso ama ula soo baxdo macluumaadka sida ku cad Qeybta B ee IDEA.

## WAX KA BEDDELKA DIIWAANNADA MARKA UU WAALIDKU CODSADO

Haddii aad rumaysan tahay in macluumaadka ku jira diiwaanada waxbarashada ee ku saabsan canugaaga ee la ururiyey, la xafiday, ama loo adeegsaday sida waafaqsan Qeybta B ee IDEA in ay tahay mid aan sax ahayn, marin habaabin ah, ama ay ku xadgudbeyso asturnaanta ama xuquuqda kale ee canugaaga, waxaad codsan kartaa hay'ada kaqeybgaleysa ee xafidaysa macluumaadka inay beddesho macluumaadka.

Hay'ada kaqeybgaleysa waa inay go'aansataa haddii la beddeli doono macluumaadka si waafaqsan codsigaaga muddada waqtiga ee macquul ah gudahiisa ee helitaanka codsigaaga.

Haddii hay'ada kaqeybgaleysa ay go'aansato in aysan beddelin diiwaanka sida la codsaday, waa inay ku ogeysiisaa go'aankaas oo ay kaala talisaa xuquuqda aad u leedahay dhageysiga sida lagu sharxay hoosta cinwaanka ***Fursadda Dhageysiga***.

## FURSADA LOOGU TALAGALAY DHAGEYSIGA

Hay'ada kaqeybgaleyso waa inay, markii la codsado, waa inay ku siiyaan fursada dhageysiga dacwada si aad uga doodo macluumaadka ku jira diiwaanka waxbarashada ee khuseeya canugaaga in ay tahay mid aan sax ahayn, marin habaabin ah, ama haddii kale xadgudub ku ah asturnaanta ama xuquuqda kale ee canugaaga.

## NIDAAMYADA DHAGEYSIGA

Dhageysiga ka hortagga macluumaadka ku jira diiwaanka waxbarashada waa in la fuliyaa iyadoo la raacaayo nidaamyada dhageysiyada noocaas ah sida ku cad Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodinida (FERPA).

## NATIIJOOYINKA DHAGEYSIGA

Haddii, sida ay tahay natiijada dhageysiga, hay'ada kaqeybgaleysa ay go'aansato in macluumaadka uu yahay mid aan sax ahayn, marin habaabineysa ama hadii kale ku xad gudbeysa asturnaanta kale ee canugaaga, waa waajib in la bedelo warbixinta si waafaqsan oo

adigana qoraal ahaan lagugula soo socodsiiyo.

Haddii, sida ay tahay natiiijada dhageysiga, hay'ada kaqeybgaleysa ay go'aansato in macluumaadka uu yahay mid sax an ahayn, marin habaabineysa, ama hadii kale aan ku xad gudbeysa asturnaanta ama xuquuqda kale ee cunugaaga, waa waajib in laguu sheego ood xaq u leedahay si aad meel u dhigtid qoraalka diiwaanada ee la xafiday ee canugaaga bayaan ka faalloonaya macluumaadka ama bixinaya sabab kasta oo aad ku diidan tahay go'aanka hay'ada kaqeybgaleysa.

Sharaxaada noocaas camal ah ee lagu qoray diiwaanada canugaaga waa waajib inay:

1. U hayso hay'ada kaqeybgaleysa oo qoralka ah diiwaanada cunugaaga ilaa iyo inta uu diiwaanka uu yahay ama qeybta loolanka ah ay xafiday hay'ada kaqeybgaleysa; **iyo**
2. Hadii hay'ada kaqeybgaleysa ay ku shaaciso/wadaagto diiwaanada canugaaga xisbi kale ama qeybta taxadarka u baahan, sharraxaadda waa in sidoo kale lala wadaago xisbigaas.

## OGGOLAANSHAHA SHAACINTA MACLUUMAADKA SHAQSIGA LAGU AQOONSAN KARO

Ilaa in macluumaadka ay ku jirto diiwaanada waxbarashada mooyee, iyo shaacinta waxaa la oggolaaday iyadoon oggolaanshaha waalidka la haysanin sida uu dhigaayo Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodinida (FERPA), oggolaanshahaaga waa in la helaa kahor inta aan macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo loo shaacinin xisbiyada aan ka ahayn mas'uuliyiinta hay'adaha kaqeybgalaayo. Marka laga reebo xaaladaha hoos ku qeexan, oggolaanshahaaga looma baahna kahor inta macluumaadka shaqsiga lagu garan karo aan loo sii deyn mas'uuliyiinta hay'adaha kaqeybgalaaya oo loogu talagalay ujeeddooyinka lagu buuxinaayo shuruuda Qeybta B ee IDEA.

Oggolaanshahaaga, ama oggolaanshaha canug u qalma kaas oo gaaray da'da qaangaarka sida waafaqsan sharciga gobolka, waa in la helaa kahor inta macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo aan loo siidayn saraakiisha hay'adaha kaqeybgalaaya bixinta ama dhiibida adeegyada kala-guurka.

Haddii canugaagu ku jiro, ama uu doonayo inuu aado, dugsi gaar loo leeyahay oo aan ku oolin isla degmada dugsiga ee aad adigu deggan tahay, oggolaanshahaaga waa in la helaa kahor inta macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo ee ku saabsan canugaaga aan loo siidayn inta u dhexeysa saraakiisha degmada dugsiga meesha dugsiga gaarka ah ku yaalo iyo saraakiisha degmada dugsiga aad adigu deggan tahay.

## ILAALINTA

Hay'ad kasta oo kaqeybgaleysa waa inay ilaalisaa qarsoodinida macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo marka la ururinayo, la kaydiyo, shaacinaayo, iyo marxaladaha burburinta.

Hal sarkaal oo ka tirsan hay'ad kasta oo kaqeybgaleysa waa inuu qaataa mas'uuliyadda xaqiijinta qarsoodinnida macluumaadka kasta oo shaqsiga lagu aqoonsan karo.

Dhammaan dadka ururinaya ama isticmaalaya macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo waa in ay helaan tababar ama tilmaamo ku saabsan xeerarka iyo nidaamyada gobolkaaga ee

khuseeya qarsoonida sida ku cad Qeybta B ee IDEA iyo Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodinida (FERPA).

Hay'ad kasta oo kaqeybgaleysa waa inay xafidaa, kormeerka dadweynaha, liiska hadda ee magacyada iyo jagooyinka shaqaalahaas ee kamid ah hay'ada kuwaas oo laga yaabo inay adeegsadeen macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo.

#### BURBURINTA MACLUUMAADKA

Iskuulka degmadaada waxaa ku waajib ku ah inuu kula socodsiiyo markii la ururiyey macluumaadka lagu aqoonsan karo qofka, la haayay, ama loo isticmaalay si waafaqsan Qeybta B ee IDEA intaa kabadan looma baahno in la siiyo adeegyada waxbarashada ee cunugaaga.

macluumaadkaan waxaa waajib ah in la baabi'iyo marka aad codsato. Si kastaba ha noqotee, qoraalka diiwaansan ee rasmiga ah ee cunugaaga magaciisa, cinwaankiisa, iyo taleefan lambarkiisa, buundooyinkooda, diiwaanka xaadirinta, fasalka uu dhigtay, heerka fasalka uu dhameeyey, iyo sanadka uu dhameeyey laga yaabaa in la keediyo iyada oon la xadideynin waqti. Adiga
waxaad xaq u leedahay inaad ka codsato degmada dugsiga inay burburiso macluumaadka waxbarashada canugaaga marka
aan mar dambe loo baahnayn.

### XALINTA KHILAAFAADKA

#### DHEXDHEXAADIN

**Guud**

Dhexdhexaadinta waxaa laga heli karaa ODE si adiga iyo degmada dugsiga kugu oggolaato in aad xallisaan khilaafaadka ku lug leh arrin kasta sida ku cad Qeybta B ee IDEA, oo ay ku jiraan arrimaha soo ifbaxaya kahor inta aan la xareysan/buuxinin cabashada xaqsoorka. Markaa, dhexdhexaadinta ayaa lagu heli xallinta muranka sida waafaqsan Qeybta B ee IDEA,, haddii aad iyo aadan aad soo gudbisatay cabashada xaqsoorka si aad u codsato dhageysi xaqsoorka sida lagu sharaxay hoosta cinwaanka ***Gudbinta Cabashada Xaqsoorka*** ama aad gudbisay cabashada waxbarasho gaar ah.

**Shuruudaha**

Nidaamyada waa inay xaqiijiyaan in habka dhexdhexaadinta:

1. Waa mid ikhtiyaar ah dhinacaaga iyo dhinaca degmada dugsiga;
2. Looma isticmaali karo in lagu dafiro ama dib loogu dhigo xaqa aad u leedahay dhageysiga xaqsoorka, ama in lagaa dafiro wax xuquuqyo kale ah ee lagu cadeeyay Qeybta B ee IDEA; **<u>iyo</u>**
3. Waxaa qabta dhexdhexaadiye ku xeeldheer oo dhexdhexaadiye eex la'aan ah oo loo tababaray farsamooyinka dhexdhexaadinta ee wax ku oolka ah.

Dawladdu waa inay haysaa liis ay ku qoran yihiin dad dhexdhexaadiyeyaal ah ku xeeldheer oona yaqaano sharciyada iyo xeerarka la xiriira bixinta waxbarashada gaarka ah iyo

adeegyada la xiriira. Dowladu waa inay ku doorataa dhexdhexaadiyeyaasha si aan kala sooc lahayn, wareegsan, ama gundhigyada kale ee eex la'aanta ah.

Gobolka ayaa mas'uul ka ah kharashka hannaanka dhexdhexaadinta, oo ay ku jiraan kharashaadka shirarka.

Kulan kasta oo ka mid ah hannaanka dhexdhexaadinta waa in loo jadwaleeyaa qaab waqti ku habboon oona lagu qabtaa meel adiga iyo degmadda dugsigaba u fiican.

Haddii adiga iyo degmada dugsigu aad khilaaf ku xallisaan hannaanka dhexdhexaadinta, labada dhinacba waa inay galaan heshiis isku xiraaya oo sharci ah oona qeexaya xallinta iyo:

1. Waxay sheegeysaa in dhammaan wada-hadalladii dhacay intii lagu jiray hannaanka dhexdhexaadinta in ay ahaan doonaan kuwo qarsoodi ah oo aan loo adeegsan karin caddayn ahaan dhageysiga xaqsoor kasta oo dambe ama dacwad rayid/madani ah (dacwad maxkamadeed); **iyo**
2. Waxaa saxiixay labadiinaba adiga iyo wakiilka dugsiga degmada kaas oo leh awood oo uu ku xiro dugsiga degmada.

Heshiis dhexdhexaadin oo qoran, oo saxiixan ayaa laga fulin karaa maxkamad gobol kasta oo awood u leh (maxkamad awood u leh sharciga gobolka si ay u dhageysato dacwada noocan ah) ama maxkamad degmo ee Mareykanka.

Wadahadalo kuwaa oo dhacay intii lagu jiray hannaanka dhexdhexaadinta waxaa waajib ah inay ahaadaan qarsoodi. Looma isticmaali karo caddayn ahaan mustaqbalka dhagaysi xaqsoor oo sharci ah ama dacwad madani ah oo ka socota maxkamad kasta federaali ah ama maxkamad gobol ee gobolka ah oo kaalmo ku helaya sida ku cad Qeybta B ee IDEA.

**Eex la'aanta dhexdhexaadiyaha**

Dhexdhexaadiyaha:

1. Ma noqon karo shaqaalaha SEA ama dugsiga degmada kaas oo ku lug leh waxbarashada ama daryeelka canugaaga; **iyo**
2. Waa in uusan lahayn danno shaqsiyeed ama mid xirfadeed oo ka hor imanaya dhexdhexaadiyaha.

Qofka haddii kale u qalma dhexdhexaadiye ma aha shaqaale ka tirsan dugsiga degmada ama hay'ada gobolka oo kaliya sababtoo ah isaga ama iyada waxaa lacag siisa hay'adda si ay ugu adeegto dhexdhexaadiye ahaan.

## NIDAAMYADA CABASHADA GOBOLKA FARQIGA U DHEXEEYA NIDAAMYADA CABASHOOYINKA XAQSOORKA IYO DHAGEYSIGA IYO CABASHOOYINKA GOBALKA

Sharciyada Qeybta B ee IDEA waxay dejinayaan nidaamyo u gooni ah oo loogu talagalay cabashooyinka gobolka iyo cabashooyinka xaqsoorka iyo dhageysiga. Sida hoos lagu sharaxay, shaqsi kasta ama urur kasta ayaa soo gudbisan kara cabashada gobolka oo ka andoconaayo ku xadgudubka wax kasta oo looga baahan yahay Qeybta B ee dugsiga degmada, SEA, ama hay'ad

dadweyna kasta oo kale.  Adiga ama dugsiga degmada oo kaliya ayaa gudbin kara cabashada xaqsoorka

arrin kasta oo la xiriirta soo jeedinta ama diidmada in la bilaabo ama la beddelo aqoonsiga, qiimeynta ama meelaynta waxbarashada ee canuga naafada ah, ama siinta waxbarashada bilaashka ah ee dadweynaha ee ku habboon (FAPE) canuga.

In kasta oo shaqaalaha SEA guud ahaan ay waajib ku tahay inay ku xalliyaan cabashada gobolka muddada waqtiga 60-maalmood-oo-taariikhda-kalendharka ah, haddii aan muddada waqtiga si habboon loo dheereynin, sarkaalka dhageysiga eexda (oo loo yaqaano garsooraha sharciga maamulka, ama ALJ) waa in uu dhageystaa cabashada xaqsoorka (haddii aan lagu xallin kulanka xallinta ama mariinka dhexdhexaadinta) oo uu ku soo saaro go'aan qoran 45 maalmood-oo-kalendharka gudahooda ka dib markii ay dhammaato muddada xallinta, sida lagu qeexay dokumentigan hoosta cinwaanka Hannaanka Xallinta, haddii uusan bixinin sarkaalka dhageysiga waqti kordhin gaar ah ee muddada waqtiga ee codsigaaga ama codsiga dugsiga degmada.

Cabashada gobolka iyo cabashada xaqsoorka, xallinta iyo nidaamyada dhageysiga ayaa si buuxda hoos loogu sharaxay. SEA waa inay soo saartaa qaabka foomamka si ay kaaga caawiso inaad soo gudbiso cabashada xaqsoorka oo ay kaa caawiso adiga ama xisbiyada/dhinacyada kale in aad soo gudbisaan cabashada gobolka sida lagu sharaxay hoosta cinwaanka ***Qaabka Foomamka.***

## QAADASHA NIDAAMYADA CABASHADA GOBOLKA

### Guud

SEA kasta waa inay lahaataa niyaamyo qoran oo loogu talagalay:

1. Xallinta cabashooyin kasta oo waxbarashada gaarka ah, oo ay kamid tahay cabashada ay soo gudbiyeen urur ama shaqsi ka socdo gobol kale; iyo
2. U gudbinta cabashada SEA.
3. Si baaxad leh ugu faafinta nidaamyada cabashada gobolka ilaa waalidiinta iyo shaqsiyaadka kale ee danaynaaya, oo ay ku jiraan xarumaha tababarka waalidka iyo macluumaadka, ilaalinta iyo hay'adaha u doodista, xarumaha nool ee madaxabannaan, iyo wakaaladaha kale ee habboon.

### Daawooyinka loogu talagalay diidmada adeegyada ku habboon

Xallinta cabashada gobolka taas oo SEA lagu helay inay ku guuldareysatay inay bixiso adeegyada ku habboonaa, SEA waa inay wax ka qabataa:

1. Ku guuldareysiga bixinta adeegyada ku habboon, oo ay ku jiraan ficilka sixitaanka ee ku habboon wax ka qabashada baahiyaha canuga (sida adeegyada magdhawga ama magdhawga lacag-celinta); **iyo**
2. Bixinta adeegyada mustaqbalka ee ku habboon dhammaan carruurta naafada ah.

**Waqtiga xaddidan; nidaamyada ugu yar**

SEA kasta waa inay ku soo dartaa nidaamyada cabashada gobolkeeda oo ay ku jiraan waqtiga xaddidan oo ah 60 maalmood oo taariikhda kalendharka ah kadib marka cabashada loo xareeyey/gudbiyey si:

1. Loo qaado baaritaan madaxbannaan oo goobta ah, haddii SEA ay go'aamiso in baaritaan laga maarmaan u yahay;
2. Loo siiyo qofka cabanaya fursad uu ku soo gudbiyo macluumaad dheeraad ah, ha ahaado hadal ama qoraal ahaan, ku saabsan eedeymaha ku jira cabashada;
3. Ay u siiyaan dugsiga degmada ama hay'ada kale ee dadweynaha fursad ay ugu soo jawaabaan cabashada, oo ay ku jirto, ugu yaraan: (a) ikhtiyaarka hay'ada, soo jeedinta lagu xallinaayo cabashada; **iyo** (b) fursad loogu talagalay waalidka soo gudbiyay cabasho iyo hay'ada inay si ikhtiyaar ah ugu heshiiyaan inay dhexdhexaadin galaan;
4. Ay dib ugu eegaan dhammaan macluumaadka khuseeya oo ay u gaaraan go'aan madaxbannaan in haddii dugsiga degmada ama hay'ada kale ee dadweynaha ay ku xadgudbeysa shuruudda Qeybta B ee IDEA; **iyo**
5. Loogu soo saaro go'aan qoran qofka cabanaaya taas oo ka hadlaysa eedeyn kasta oo ku jirta cabashada iyadoo (a) natiijooyinka xaqiiqda iyo gabagabada; **iyo** (b) sababaha go'aanka kama dambaysta ah ee SEA.

**Kordhinta waqtiga; go'aanka kama dambeysta ah; hirgelinta**

Nidaamyada Hay'ada Waxbarashada Gobolka ee kor lagu sharaxay sidoo kale waa inay:

1. Oggolaadaan kordhinta 60-ka maalin oo taariikhda kalendharka ee waqtiga xaddidan kaliya haddii: (a) duruufo gaar ah ayaa jiraan marka la eego cabashada gobolka ee gaarka ah; **ama** (b) adiga iyo dugsiga degmada ama hay'ad kale oo dadweynaha oo ku lug leh si ikhtiyaar ah ugu heshiyeen in la kordhiyo waqtiga lagu xallinaayo arrinta iyada oo loo marayo dhexdhexaadin ama xallinta deegaanka.
2. Ku jiraan nidaamyada si waxtar leh loo hirgeliyo go'aanka kama dambeysta ah ee SEA, haddii loo baahdo, oo ay kamid yihiin: (a) hawlaha kaalmada farsamada; (b) wada xaajoodyada; **iyo** (c) tallaabooyinka sixitaanka si loogu guleysto hoggaansanaanta.

**Cabashooyinka gobolka iyo dhageysiga xaqsoorka**

Haddii cabashada gobolka oo qoran la helo taas ayaa sidoo kale ah mawduuca dhageysiga xaqsoorka sida lagu sharaxay hoosta cinwaanka ***Gudbinta Cabashada Hanaanka Xaqsoorka***, ama cabashada gobolku waxay ka kooban tahay arrimo badan oo mid ama ka badan ay qeyb ka yihiin dhageysiga noocaan ah, gobolku waa inuu dhinac iska dhigaa qeyb kasta oo ka mid ah cabashada taas oo wax looga qabanaayo dhageysiga hannaanka xaqsoorka illaa dhageysiga uu ka dhammaado. Arrin kasta oo ku jirta cabashada gobolka oo aan qeyb ka ahayn dhageysiga hannaanka xaqsoorka waa in lagu xalliyaa iyadoo la isticmaalayo waqtiga xaddidan iyo nidaamyada kor lagu soo sharaxay.

Haddii arrin lagu soo bandhigay cabashada gobolka hore loogu go'aamiyay dhageysiga hannaanka xaqsoorka oo ay ku lug leeyihiin isla xisbiyadii (tusaale ahaan, adiga iyo dugsiga degmada), markaas go'aanka dhageysiga hannaanka xaqsoorka ayaa ku xiran arrintaas oo SEA waa inay ku wargelisaa qofka cabanaya in go'aanka uu yahay mid ku xiran.

Cabasho lagu eedeynaayo dugsiga degmada ama hay'ad dadweyne oo kale inay ku guuldareysteen inay fuliyaan go'aanka dhageysiga
hannaanka xaqsoor waa inay ku lug lahaataa SEA.

## GUDBINTA CABASHADA GOBOLKA

Urur ama shaqsi ayaa gudbin kara cabashada gobolka ee qoran oona saxiixan iyadoo la raacayo nidaamyada kor lagu soo sharraxay.

Cabashada gobolka waa inay ku jiraan:

1. Bayaan ah in dugsiga degmada ama hay'ad kale oo dadweyne ay ku xadgudbeen qawaaniinta Qeybta B ee IDEA ama xeerarkeeda hirgelinta ee 34 CFR Qeybta 300;
2. Xaqiiqooyinka uu bayaanka ku salaysan yahay;
3. Saxiixa iyo macluumaadka lagala xiriirayo dhinaca cabashada gudbinaya; iyo
4. Haddii lagu eedeynayo xadgudubyo la xiriira ilmo gaar ah:
   - (a) Magaca canuga iyo cinwaanka meesha uu canugu deggan yahay;
   - (b) Magaca dugsiga uu canugu dhiganaayo;
   - (c) Marka laga hadlayo canug ama dhalinyaro gurilaawe ah, macluumaadka laga heli karo canuga, iyo magaca dugsiga uu canugu dhiganaayo;
   - **(d)** Sharaxaada ku saabsan nooca dhibaatada canuga, oo ay ku jiraan xaqiiqooyinka la xiriira dhibaatada; <u>**iyo**</u>
   - (e) Xallinta dhibaatada la soo jeediyay ilaa xadka la og yahay oo ay heli karan dhinaca soo gudbinayo cabashada wakhtiga cabashada la gudbiyey.

Cabashadu waa inay sheegataa xadgudub dhacay wax aan ka badnayn hal sano kahor taariikhda la helay cabashada sida lagu sharaxay hoosta cinwaanka ***Qaadashada Nidaamyada Cabashada Gobolka***.

Kooxda soo gudbineysa cabashada gobolka waa inay u gudbiyaan nuqulka cabashada dugsiga degmada ama hay'ad kale oo dadweyne oo u adeegaysa canugga isla markaa waqtiga dhinaca u gudbinaayo cabashada SEA.

# NIDAAMYADA CABASHADA HANNAANKA XAQSOORKA

### GUDBINTA CABASHADA HANNAANKA XAQSOORKA

**Guud**

Adiga ama dugsiga degmada waxaad codsan kartaan dhageysiga hannaanka xaqsoorka ee ku saabsan arrin kasta oo la xiriirta soo jeedinta ama diidmada in la bilaabo ama la beddelo aqoonsiga, qiimeynta ama meelaynta waxbarashada ee canugaaga, ama siinta waxbarashada habboon ee dadweynaha ee bilaashka ah (FAPE) ee ku aadan canugaaga.

Cabashada hannaanka xaqsoorka waa inay sheegataa xadgudub dhacay wax aan ka badnayn laba sano kahor intaan adiga ama dugsiga degmada ogayn ama ay ahayd inay ogaadaan falka la eeday kaas oo gundhiga u ah cabashada hannaanka xaqsoorka.

Jadwal-waqtiyeedka kor ku xusan adiga kuma quseeyo haddii aadan ku gudbisan karin codsiga dhageysiga hannaanka xaqsoorka jadwal-waqtiyeedka gudahiisa maxaa yeelay:

1. Dugsiga degmada ayaa gaar ahaan si qaldan u fasiray inay xallisay arrimaha lagu tilmaamay cabashada dhexdeeda; **ama**
2. Dugsiga degmada ayaa adiga kaa qariyey macluumaad taas oo laga rabay inay ku siiso sida ku cad Qeybta B ee IDEA.

**Macluumaadka loogu talagalay waalidiinta**

ODE ayaa kugu wargelin doonta wax kasta oo sharci ah oo lacag la'aan ah ama qiima-jaban iyo adeegyada kale ee la xiriira ee laga heli karo goobta dhexdeeda haddii aad codsato macluumaadka. Dugsiga degmada waa inay ku siisaa macluumaadka noocaas ah haddii aad codsato ama adiga ama dugsiga degmada uu gudbisto cabashada hannaanka xaqsoorka.

## CABASHADA HANNAANKA XAQSOORKA

**Guud**

Si aad u codsato dhageysi, adiga ama dugsiga degmada (ama qareenkaaga ama qareenka dugsiga degmada) waa in aad u gudbisaan dhageysiga hannaanka xaqsoorka dhinac kale. Codsiga dhageysiga waa inay ku jiraan dhammaan waxyaabaha hoos ku qoran waana in loo xafidaa si qarsoodi ah.

Qof kasta oo soo gudbista cabashada waa inuu sidoo kale SEA siiyaa nuqul ka mid codsiga dhageysiga.

**Nuxurka codsiga dhageysiga**

codsiga dhageysiga hannaanka xaqsoorka waa inay ku jiraan:

1. Magaca canuga;
2. Cinwaanka meesha uu canugu deggan yahay;
3. Magaca dugsiga canuga;
4. Haddii canuga la kulmaayo guri la'aan, macluumaadka xiriirka canuga iyo magaca dugsiga canuga;
5. Sharaxaada ku saabsan nooca dhibaatada canuga ee la xiriirta falka la soo jeediyay ama la diiday, oo ay ku jiraan xaqiiqooyinka la xiriira dhibaatada; **<u>iyo</u>**
6. Xallinta dhibaatada la soo jeediyay ilaa xadka la og yahay oo ay heli karan dhinaca cabanaaya (adiga ama dugsiga degmada) wakhtiga.

Adiga ama dugsiga degmada ma yeelan kartaan dhageysiga hannaanka xaqsoorka ilaa adiga ama dugsiga degmada (ama qareenkaaga ama qareenka dugsiga degmada) aad gudbisataan codsiga dhageysiga hannaanka xaqsoorka oo ay ku jiraan macluumaadka kor ku xusan.

**Ku filnaanshaha codsiga dhageysiga**

Codsiga dhageysiga hannaaanka xaqsoorka si horay looga sii socodsiyo, waa in loo tixgeliyaa mid ku filan. Codsiga dhageysiga waxaa loo tixgelin doonaa mid ku filan (si loo buuxiyo nuxurka shuruudaha kor ku xusan) marka laga reebo haddii dhinaca helaya codsiga dhageysiga (adiga ama dugsiga degmada) qoraal ahaan ku ogeysiiyaan sarkaalka dhageysiga iyo dhinaca kale, 15 maalmood oo kalendharka gudahood marka la helo cabashada, in dhinaca helaaya ay aaminsan yihiin in codsiga dhageysiga uusan buuxinin shuruudaha kor ku xusan.

Muddo shan maalmood oo kalendharka ah gudahood marka la helo ogeysiiska ah in dhinaca helay (adiga ama dugsiga degmada) ay tixgeliyaan cabashada hannaanka xaqsoorka, sarkaalka dhageysigu waa inuu go'aamiyaa haddii cabashadu buuxisay shuruudaha kor ku xusan, oo isla markiiba qoraal ahaan idiinku ogeysiiso adiga iyo dugsiga degmada.

**Wax ka badelka codsiga dhageysiga**

Adiga ama dugsiga degmada waxaad sameyn kartaan isbedelo ku aadan codsiga dhageysiga kaliya haddii:

1. Dhinaca kale wuxuu ku oggolaaday isbeddellada qoraal ahaan waxaana la siiyay fursad uu ku xaliyo codsiga dhageysiga hannaanka xaqsoorka iyada oo loo marayo kulanka xallinta, oo lagu sharraxay cinwaanka ***Hannaanka Xallinta***; **<u>ama</u>**
2. Ugu dambayn shan maalmood kahor inta aan la bilaabin dhageysiga hannaanka xaqsoorka, sarkaalka dhageysigu wuxuu bixiyaa oggolaanshaha isbeddelada.

Haddii xisbiga cabanaaya (adiga ama dugsiga degmada) ay wax ka beddelaan codsiga dhageysiga hannaanka xaqsoorka, jadwal-waqtiyeedka oo loogu talagalay kulanka xallinta (15 maalmood oo taariikhda kalendharka ah gudahooda marka la helo codsiga dhageysiga) iyo muddada waqtiga xallinta (30 maalmood oo taariikhda kalendharka ah gudahooda marka la helo codsiga dhageysiga) waxay mar kale bilaabmaysaa taariikhda cabashada la beddelay la gudbiyey.

**Jawaabta dugsiga degmada ee ku aadan cabashada hannaanka xaqsoorka**

Haddii dugsiga degmada aysan kuu soo dirin ogeysiis hore oo qoraal ah, sida lagu sharxay hoosta cinwaanka ***Ogeysiiska Qoraalka Hore***, ee ku saabsan mawduuca ku jira cabashada hannaankaada xaqsoorka,, dugsiga degmada waa inay, 10 maalmood oo taariikhda kalendharka ah gudahood ka dib marka la helo codsiga dhageysiga hannaanka xaqsoorka, ay kuu soo dirto jawaab ay ku jirto:

1. Sharaxaada sababta dugsiga degmada u soo jeedisay ama u diiday inay qaado talaabada lagu soo qaaday cabashada hannaanka xaqsoorka;
2. Sharaxaada xulashooyinka kale ee kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiyeed (IEP) taas oo canugaaga ay tixgelisay iyo sababaha loo diiday xulashooyinkaas;
3. Sharaxaada nidaamka qimeyn kasta, baaritaan, diiwaan, ama warbixinta dugsiga degmada ee loo adeegsaday gundhiga tallaabada la soo jeediyay ama la diiday; **iyo**
4. Sharaxaada arrimaha kale ee khuseeya tallaabada soo jeedinta dugsiga degmada ama tallaabada diidmada.

Bixinta macluumaadka ku jira qodobada 1-4 ee kore kama difaacaayaan dugsiga degmada inay sheegto in codsigaaga dhageysiga hannaanka xaqsoorka uusan ku filnayn.

**Jawaabta xisbiga kale ee ku aadan cabashada hannaanka xaqsoorka**

Marka laga reebo sida lagu sheegay hoosta cinwaan-hoosaadka isla markiiba kor ku xusan, ***jawaabta dugsiga degmada ee ku aadan cabashada hannaanka xaqsoorka***, xisbiga helaya codsiga dhageysiga hannaanka xaqsoorka waa in, 10 maalmood taariikhda kalendharka ah gudahood ka dib markii u helo codsiga dhageysiga, u dir xisbiga kale jawaab si gaar ah uga hadlaysa arrimaha codsiga dhageysiga.

## FOOMAMKA TUSAALAHA

SEA waa inay soo saartaa foomamka tusaalaha ah si ay kaaga caawiso inaad soo gudbiso codsiga dhageysiga xaqsoorka iyo inay kaa caawiso adiga iyo xisbiyada kale inaad gudbisataan cabashada gobolka Si kastaba ha noqotee, gobolkaaga ama dugsiga degmada ayaa laga yaabaa in aanay u baahneyn isticmaalka foomamka tusaalaha ah.  Xaqiiqdii, waxaad isticmaali kartaa foomamka tusaalaha ah ee gobolka ama foom kale oo habboon, ilaa inta ay ku jirto macluumaadka loo baahanyahay si loo gudbiyo cabashada codsiga dhageysiga xaqsoorka ama cabashada gobolka.

## MEELAYNTA CANUGA INTA CABASHADA HANNAANKA XAQSOORKA IYO DHAGEYSIGANA LA SUGAAYO

Marka laga reebo sida hoos ku qoran ee hoosta cinwaanka ***NIDAAMYADA MARKA LA EDBINAAYO CARRUURTA NAAFADA AH,*** mar haddii cabashada codsiga dhageysiga xaqsoorka loo diro xisbiga kale,, inta lagu guda jiro waqtiga muddada hannaanka xallinta, iyo inta la sugaayo go'aanka dhageysiga hannaanka xaqsoor kasta oo eex la'aanta ah ama dacwad maxkamadeed, marka laga reebo haddii adiga iyo dugsiga degmada aad si kale ku heshiin weydaan, canugaaga waa inuu ku sii jiraa meelayntooda waxbarasho ee hadda.

Haddii cabashada hannaanka xaqsoorka ay ku lug leedahay codsi gelitaanka hore ee dugsiga

dadweynaha, canugaaga, adiga oo oggolaansho haysta, waa in lagu meeleeyaa barnaamijka caadiga ah ee dugsiga dadweynaha ilaa inta laga dhammaystiraayo dhammaan dacwadaha noocaas ah.

Haddii cabashada hannaanka xaqsoorka ay ku lug leedahay codsi adeegyada bilowga ah oo hoos yimaada Qeybta B ee IDEA oo loogu talagalay canug ka gudbaya in loo adeego Qeybta C ee IDEA oo aan hadda u -qalmin adeegyada Qeybta C maxaa yeelay canugu wuxuu noqday saddex jir, dugsiga degmada uma baahna inay bixiso adeegyada Qeybta C ee canugu uu qaadanayey. Haddii canuga lagu helo inuu xaq u leeyahay sida ku cad Qeybta B ee IDEA oo aad ogolaato inuu canugaaga helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira markii ugu horeysay, markaa, iyadoo la sugayo natiijada dacwada, dugsiga degmada waa inay bixisaa waxbarashadaas gaarka ah iyo adeegyada la xiriira ee uusan khilaafka kujirin (kuwa adiga iyo dugsiga degmada aad isku wada raacdaan).

Haddii sarkaalka dhageysiga ee kujira dhageysiga hannaanka xaqsoorka oo ay qabato Hay'ada Waxbarashada Gobolka ay kugula heshiiso in beddel meelaynta habboon tahay, meelayntaas waa in loola dhaqmaa sidii meelaynta waxbarashada hadda ee canugaaga halkaas oo canugaaga joogi doono inta laga sugasyo go'aanka dhageysiga hannaanka xaqsoorka ee eex la'aanta ah ama dacwad maxkamadeed.

## HANNAANKA XALINTA

### Kulanka xalinta

15 maalmood oo kalendharka ah gudahooda marka la helo ogeysiiska cabashada hannaanka xaqsoorka, iyo kahor inta uusan bilaaban dhageysiga hannaanka xaqsoorka, dugsiga degmada waa inay kulan isugu yeertaa adiga iyo xubinta ay khuseyso ama xubnaha kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiyeed (IEP) kuwaas oo aqoon gaar ah u leh xaqiiqooyinka lagu tilmaamay cabashada hannaanka xaqsoorkaaga. Kulanka:

1. Waa inuu ku jiraa wakiil ka socda dugsiga degmada oo leh awood go'aan-qaadasho isagoo wakiil ka ah dugsiga degmada; **iyo**
2. Waxaa laga yaabaa inuusan ku jirin qareenka dugsiga degmada marka laga reebo haddii uusan ku wehelinin qareen.

Adiga iyo dugsiga degmada waxay go'aamiyaan xubnaha ay khuseyso ee Kooxda IEP inay ka soo qaybgalaan kulanka.

Ujeedada kulanku waa inaad adinka kawada hadashaan codsigaaga dhageysiga hannaanka xaqsoorka, iyo xaqiiqooyinka gundhiga u ah codsiga, si dugsiga degmada u hesho fursad ay ku xalliso khilaafka.

Kulanka xallinta lama baahna haddii:

1. Adiga iyo dugsiga degmada aad ku heshiisaan qoraal ahaan in aad ka tanaasusho kulanka; **ama**
2. Adiga iyo dugsiga degmada aad isku raacdaan in aad isticmaashaan hannaanka dhexdhexaadinta, sida lagu sharaxay hoosta cinwaanka ***Dhexdhexaadinta***.

**Muddada xalinta**

Haddii dugsiga degmada aysan ku xallin cabashada codsiga dhageysiga hannaanka xaqsoorka oo aad ku qanacdo 30 maalmood oo taariikhda kalendharka ah marka la helo codsiga (inta lagu guda jiro muddada hannaanka xallinta), dhageysiga hannaanka xaqsoorka ayaa dhici karta.

Jadwal-waqtiyeedka 45-ka maalmood oo kalendharka ah ee soo saarista go'aanka dhageysiga hannaanka xaqsoorka ugu dambeeya, sida lagu sharaxay hoosta cinwaanka, ***Go'aannada Dhageysiga***, wuxuu bilaabmayaa dhammaadka 30-ka maalmood oo kalendharka ah ee muddada xallinta, iyadoo laga reebay qaar ka mid ah hagaajinta lagu sameeyay muddada xallinta 30-ka malmood oo kalendharka ah, sida hoos lagu sharaxay.

Marka laga reebo meesha adiga iyo dugsiga degmada aad ku heshiiseen in aad ka tanaasushaan hannaanka xallinta ama in aad isticmaashaan dhexdhexaadin,, ku guul darreysigaaga ka qeybgalka kulanka xallinta ayaa dib u dhigi doonta jadwal-waqtiyeedka hannaanka xallinta iyo dhageysiga hannaanka xaqsoorka illaa kulanka laga qabanayo.

Haddii, kadib sameynta dadaalo macquul ah iyo diiwaangelinta dadaalladaas, dugsiga degmada aysan awoodin inay hesho kaqeybgalkaaga kulanka xallinta, waxaa laga yaabaa in dugsiga degmada, dhammaadka 30-ka maalmood ee kalendharka ee muddada xallinta, codso in sarkaalka dhagaysiga in uu iska diido codsigaaga ku saabsan dhageysiga hannaanka xaqsoorka. Diiwaangalinta dadaallada noocaas ah waa inay ku jiraan diiwaanka dugsiga degmada isku daygeyda in la diyaariyo oo heshiis lagu wada gaaro waqti iyo goob la isla qaatay, sida:

1. Diiwaanada faahfaahsan ee wicitaannada taleefanka la sameeyey ama la iskudayay iyo natiijooyinka wicitaannadaas;
2. Nuqulada waraaqaha laguu soo diray iyo wixii jawaabo ah ee laga helay; **iyo**
3. Diiwaanada faahfaahsan ee booqashooyinka lagu tagay gurigaaga ama goobta shaqada iyo natiijooyinka booqashooyinkaas.

Haddii dugsiga degmada ku guuldaraysato inay qabato kulanka xallinta 15 maalmood oo kalendharka ah gudahood marka la helo ogaysiiska codsiga dhageysiga hannaanka xaqsoorka **ama** ay ku guul daraysato inay kaqaybgasho kulanka xallinta, waxaad weydiisan kartaa sarkaalka dhageysiga inuu bilaabo 45 maalmood oo kalendharka jadwal-waqtiyeedka ah ee dhageysiga hannaanka xaqsoorka bilaabmaysa.

**Isku-hagaajinta 30-ka maalmood oo kalendharka ah ee muddada xallinta**

Haddii adiga iyo dugsiga degmada aad qoraal ku heshiiseen si aad uga tanaasushaan kulanka xallinta, markaas jadwal-waqtiyeedka 45-ka maalmood ee kalendharka ah ee loogu talagalay dhageysiga hannaanka xaqsoorka ayaa bilaabmaya maalinta xigta.

Kadib bilowga dhexdhexaadinta ama kulanka xallinta iyo kahor dhammaadka 30-ka maalmood ee muddada xallinta, haddii adiga iyo dugsiga degmada aad qoraal ku heshiisaan in wax heshiis ah uusan suurtogal ahayn, markaas jadwal-waqtiyeedka 45-ka maalmood oo kalendharka ah ee dhageysiga hannaanka xaqsoorka wuxuu bilaabmayaa maalinta xigta.

Haddii adiga iyo dugsiga degmada aad ku heshiisaan in aad isticmaashaan hannaanka dhexdhexaadinta laakiin aadan weli gaarin is afgarad, dhammaadka 30-ka maalmood ee muddada xallinta hannaanka dhexdhexaadinta ayaa laga yaabaa in la sii wado ilaa heshiis laga

gaaro haddii labada xisbi/dhinac oggolaadaan kusii waditaanka qoraal ahaan.
Si kastaba ha noqotee, haddii adiga ama dugsiga degmada aad ka noqotaan hannaanka dhexdhexaadinta inta lagu jiro muddadan sii wadista, tmarkaas jadwal-waqtiyeedka 45-maalmood oo kalendharka ah ee loogu talagalay dhageysiga hannaanka xaqsoorka wuxuu bilaabmayaa maalinta xigta.

**Dejinta heshiiska qoran**

Haddii heshiis laga gaaro qilaafka inta uu socdo shirka xallinta, adiga iyo dugsiga degmaada waa in aad gashaan heshiis qoran oo sharci ahaan waajib idinku ah, kaasoo:

**1.** Aad saxiixdid adiga iyo wakiilka dugsiga degmada ee awoodda u leh in uu mattalo dugsiga degmada; **iyo**

2. Laga hirgalin karo maxkamad kasta oo gobol oo awood u leh (maxkamad gobol oo awood u leh inay dhageysato dacwada noocan ah) ama maxkamad degmo ee Mareykanka.

**Muddada dib u eegista heshiiska**

Haddii adiga iyo dugsiga degmada aad heshiis kawada gashaan natiijada kulanka xallinta, labada xisbi (adiga ama dugsiga degmada) ayaa burin kara heshiiska 3 maalmood oo shaqo gudahood laga bilaabo wakhtiga adiga iyo dugsiga degmada aad saxiixdeen heshiiska.

# DHAGEYSIGA CABASHOOYINKA HANNAANKA XAQSOORKA

## DHAGEYSIGA HANNAANKA XAQSOORKA EEX LA'AANTA AH

**Guud**

Mar kasta oo la codsado dhageysiga hannaanka xaqsoorka, adiga ama dugsiga degmada ee ku lugta leh muranka waa inaad fursad u heshaan dhageysiga hannaanka xaqsoorka eex la'aanta ah, sida lagu sharaxay qeybaha ***Cabashada Hannaanka Xaqsoorka*** iyo ***Hannaanka Xallinta***

**Sarkaalka dhageysiga eex la'anta ah**

Ugu yaraan, sarkaalka dhageysiga:

1. Waa in uusan noqon shaqaale ka tirsan SEA ama dugsiga degmada kaas oo ku lug leh waxbarashada ama daryeelka canuga. Si kastaba ha noqotee, qofku ma aha shaqaale ka tirsan hay'ada kaliya sababtoo ah qofka ayaa lacag ka qaata hay'adda ODE si uu ugu adeego sarkaalka dhegeysiga camal;

2. Waa in uusan lahaanin danno shaqsiyeed ama mid xirfadeed taas oo ka soo horjeeda ujeeddada ALJ
ee dhageysiga;

**3.** Waa inuu noqdaa mid aqoon u leh oo fahmaayo qodobbada IDEA, iyo xeerarka federaalka iyo gobolka ee ku saabsan IDEA, iyo fasiraadaha sharciga ah ee IDEA ee maxkamadaha federaalka iyo kuwa gobolka; **iyo**

4. Waa inuu lahaadaa aqoonta iyo kartida uu ku fuliyo dhageysiyada, iyo inuu

sameeyo oo qoro go'aannada, oo waafaqsan habboonaanta, dhaqanka sharciga ee caadiga ah.

Dugsi degmed kasta waa inay haystaan liiska dadka u adeega ALJ-yada iyo bayaanka aqoonta mid kasta.

**Mawduuca dhageysiga arrimaha hannaanka xaqsoorka**

Dhinaca (adiga ama dugsiga degmadda) ee codsada dhageysiga hannaanka xaqsoorka ayaa laga yaabaa inaysan ku soo qaadin arrimaha dhageysiga hannaanka xaqsoorka kuwaa oo aan lagu soo hadal qaadin codsigii dhageysiga hannaanka xaqsoorka, marka laga reebo haddii dhinaca kale ay ogoladaan.

**Jadwal-waqtiyeedka loogu talagalay codsashada dhageysiga**

Adiga ama dugsiga degmada waa inaad codsataan dhageysi eex la'aan ah oo ku saabsan cabashada hannaanka xaqsoorka laba sano gudahood laga bilaabo taariikhda adiga ama dugsiga degmada aad ogaateen ama ay ahayd inaad ogaataan arrinta (arrimaha) looga hadlay codsiga dhageysiga dhexdiisa.

**Ka reebitaannada Ku aadan Jadwal-waqtiyeedka**

Jadwal-waqtiyeedka kore ma khuseeyo haddii aadan gudbisan karin codsiga dhageysiga hannaanka xaqsoorka sababtoo ah:

1. Dugsiga degmada ayaa si khaldan u fasiray inay xallisay dhibaatadii ama arrintii aad kusoo jeedisay cabashadaada; **ama**
2. Dugsiga degmada waxay kaa qarisay macluumaad laga rabay inay ku siiso sida ku cad Qeybta B ee IDEA.

## XUQUUQDA DHAGEYSIGA

**Guud**

Waxaad xaq u leedahay inaad adigu wakiil ka noqoto dhegaysiga hannaanka xaqsoorka. Intaa waxaa dheer, dhinac kasta oo ku saabsan tahay dhageysiga hannaanka xaqsoorka (oo ay ku jiraan dhageysiga la xiriira nidaamka edbinta) wuxuu xaq u leeyahay:

1. In la raaco oo uu la taliyo qareen iyo/ama dad u leh aqoon gaar ah ama tababar ku saabsan dhibaatooyinka carruurta naafada ah;
2. Inuu matalo dhageysiga hannaanka xaqsoorka qareen;
3. Inuu soo bandhigo caddeymo oo uu wajaho, su'aalo weydiinta marqaatiga, oo uu u baahdo imaanshaha markhaatiyada;
4. Inuu mamnuuco soo bandhigidda wax caddayn ah Marka la joogo dhageysiga taas oo aan loo sheegin dhinacaas/xisbigaas ugu yaraan shan maalmood oo shaqo kahor dhageysiga;
5. Inuu helo qoraal, ama, ikhtiyaarkaaga, elektaroonig, diiwaanka eray-ilaa-eray ee dhageysiga;
**iyo**

6. Inuu helo qoraal, ama, ikhtiyaarkaaga, natiijooyinka elektaroonigga ah ee xaqiiqda iyo go'aamada.

**Shaacinta dheeraadka ah ee macluumaadka**

Ugu yaraan shan maalmood oo shaqo kahor dhageysiga hannaanka xaqsoorka, adiga iyo dugsiga degmada waa inaad u sheegtaan midba midka kale dhammaan qiimeynta la dhammaystiray taariikhdaas iyo talooyinka ku salaysan qiimeynta oo adiga ama dugsiga degmada damacsan tahay inaad ku isticmaashaan dhageysiga.

Sarkaalka dhageysiga ayaa ka horjoogsan kara dhinac kasta oo ku guuldaraysta inuu u hoggaansamo qawaaniintaan inuu soo bandhigo qiimeynta ama talooyinka khuseysa dhageysiga iyada oo aan oggolaansho laga helin dhinaca kale.

**Xuquuqda waalidnimo ee dhageysiga**

Waxaa waajib ah in lagu siiyo xaqa aad u leedahay:

1. In uu canugaaga kula joogo dhageysiga;
2. In aad ku furto dhageysiga dadweynaha; **<u>iyo</u>**
3. In aad haysato diiwaanka dhageysiga, natiijooyinka xaqiiqda iyo go'aamada adiga lagugu siiyay si kharash la'aan ah.

## GO'AAMADA DHAGEYSIGA

**Go'aanka Garsooraha ee Maamulka Sharciga**

Go'aanka sarkaalka dhageysiga ee ku saabsan in canugaaga helay waxbarashada habboon ee dadweynaha oo bilaashka ah (FAPE) waa in lagu kor saleeyaa caddayn iyo muran kaas oo si toos ah ula xiriira FAPE.

Arrimaha ku saabsan xadgudubka nidaamka (sida "Kooxda IEP oo aan dhammeystirneen"), sarkaalka dhageysiga ayaa laga yaabaa inuu ogaado in uusan canugaaga helin FAPE kaliya haddii xadgudubyada nidaamka:

1. Ay farageliyeen xuquuqda canugaaga u leeyahay waxbarashada habboon ee dadweynaha oo bilaashka ah (FAPE);
2. Ay si weyn u farageliyeen fursaddaadii aad kaga qeybgali lahayd hannaanka go'aan-qaadashada ee la xiriira bixinta waxbarashada habboon ee dadweynaha ee habboon (FAPE) ee canugaaga; **<u>ama</u>**
3. Ay sababeen in canugaaga laga qaado faa'iidada waxbarashada.

Mid kasta oo ka mid ah qodobbada kor lagu sharraxay midna looma fasiri karo si looga hortago in sarkaalka dhageysiga uu ku amro dugsiga degmada inuu u hoggaansamo shuruudaha ku jira qeybta ilaalinta nidaamka ee qawaaniinta federaalka ee hoos yimaada Qeybta B ee IDEA (34 CFR §§300.500 ilaa 300.536).

**Codsi gooni ah oo loogu talagalay dhageysiga hannaanka xaqsoorka**

Wax ku jira qeybta ilaalinta nidaamka ee qawaaniinta federaalka ee hoos yimaada Qeybta B ee IDEA (34 CFR §§300.500 ilaa 300.536) laguma tarjumi karo si looga hortago in aad gudbisato cabashada hannaanka xaqsoorka oo gooni ah oo ku saabsan arrin ka duwan cabashada

hannaanka xaqsoorka oo horay loo gudbiyey.

**Natiijooyinka iyo go'aanka la siiyay guddiga la-talinta iyo dadweynaha guud**

SEA ama dugsiga degmada (hadba kii mas'uul ka ahaa dhageysigaaga), kadib markii ay tirtireen wixii macluumaad oo shaqsi ahaan lagu aqoonsan karo, waa inay:

1. Ku siiyaan natiijooyinka iyo go'aamada dhageysiga hannaanka xaqsoorka ama rafcaanka ku aadan guddiga la-talinta waxbarashada gaar ah ee gobolka; **<u>iyo</u>**
2. Ka dhigaan natiijooyinkaas iyo go'aammada kuwa ay heli karaan dadweynaha.

## JADWAL-WAQTIYEEDKA IYO SAHLANAANTA DHAGEYSIGA; DHAMMAANSHAHA GO'AANKA

SEA waa inay hubisaa in aan ka dambeyn 45 maalmood oo kalendhaka ah kadib dhammaadka muddada 30ka maalmood ee kalendharka ee loogu talagalay kulamda xallinta ama, sida lagu sharaxay hoosta cinwaan-hoosaadka ***Ku hagaajinta muddada xallinta 30-ka maalmood ee kalendarka***, oo aanan ka dambeyn 45 maalmood oo kalendarka ah kadib dhicitaanka muddada wakhtiga loo hagaajiyey:

1. Go'aan kama-dambays ah ayaa lagu gaaraa dhageysiga; **<u>iyo</u>**
2. Nuqul ka mid ah go'aanka waxaa loo diraa dhinac kasta oo kamid ah.

Sarkaalka dhageysiga ayaa laga yaabaa inuu siiyo waqti kordhin gaar ah oo ka baxsan maalinta 45aad ee kalendharka mudada wakhtiga ee lagu qeexay kor codsiga labada dhinacba (adiga ama dugsiga degmadda).

Dhageysi kasta waa in lagu sameeyaa waqti iyo goob si macquul ah adiga iyo canugaaga ugu habboon.

**Dhammaanshaha go'aanka dhageysiga**

Go'aanka lagu gaaray dhageysiga dacwadda (oo ay ku jiraan dhageysiga la xiriira nidaamyada edbinta) waa kama-dambays, marka laga reebo dhinac kasta oo ku lug leh dhageysiga (adiga ama dugsiga degmada)
waxay rafcaan ka qaadan karaan go'aanka iyagoo keenaya tallaabo madani ah, sida lagu qeexay hoosta cinwaanka ***Tallaabada Madaniga ah, oo ay kujirto Mudada Wakhtiga la Gudbinaayo Tallaabooyinkaas.***

## TALLAABOOYINKA MADANIGA AH, OO AY KUJIRTO MUDADA WAQTIGA EE LA GUDBINAAYO TALLAABOOYINKAAS

**Guud**

Dhinac kasta (adiga ama dugsiga degmada) oo aan ku raacsanayn natiijooyinka iyo go'aanka dhageysiga hannaanka xaqsoorka (oo ay ku jiraan dhageysi la xiriira nidaamyada edbinta) waxay xaq u leeyihiin inay keenaan tallaabo madani ah oo la xiriirta arrinta ku saabsan dhageysiga hannaanka xaqsoorka. Tallaabada waxaa laga yaabaa in la keeno maxkamada gobolka ee awooda u leh (maxkamad gobol oo awood u leh inay dhageysato dacwada noocan ah) ama maxkamad degmo oo federaal ah iyada oo an la eegin qadarta khilaafka ka taagan yahay.

**Xadidaada waqtiga**

Dhinaca/xisbiga (adiga ama dugsiga degmada) ee keenaya tallaabada waxay haystaan 90 maalmood oo kalendhar ah laga bilaabo taariikhda go'aanka sarkaalka dhageysiga si loo gudbiyo fal madani ah.

**Nidaamyo dheeraad ah**

Tallaabo kasta oo madani ah, maxkamada:

1. Waxay heshaa diiwaanada dacwadaha maamulka;
2. waxay dhageysataa caddayn dheeraad ah oo ku salaysan codsigaaga ama codsiga dugsiga degmadda; **iyo**
3. Waxay go'aankeeda ku salaysaa mudnaanta caddeynta waxayna siisaa gargaarka ay maxkamada ku go'aamiso inay noqoto mid ku habboon.

Xaaladaha ku habboon hoostooda, gargaarka garsoorka waxaa ka mid noqon kara dib u bixinta kharashka waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada waxbarashada magdhowga ah.

**Awoodda maxkamadaha dagmada**

Maxkamadaha dagmada ee Mareykanka ayaa awood u leh inay go'aan ka gaaraan falalka la keenay hoosta Qeybta B ee IDEA iyadoon la eegin qadarka khilaafka ka taagan yahay.

**Xeerka dhismaha**

Ma jiro wax ku jira Qeybta B ee IDEA oo xaddidaya ama yareynaayo xuquuqda, nidaamyada, iyo xalalka laga heli karo Dastuurka Mareykanka, Xeerka Naafada Mareykanka ee 1990, Cinwaanka V ee Xeerka Dhaqancelinta 1973 (Qeybta 504), ama sharciyada kale ee federaalka ee dhowraya xuquuqda carruurta naafada ah, marka laga reebo ka hor inta aan la gudbinin tallaabo madani ah oo hoos timaada sharciyadan raadinaysa gargaarka oo sidoo kale lagu heli karo Qeybta B ee IDEA, hannaanka nidaamyada xaqsoorka ah ee kor lagu sharraxay waa in uu ahaado mid la mid ah sidii loo baahnaa haddii dhinacyadu gudbiyey tallabada sida waafaqsan Qeybta B ee IDEA. Tan waxaa loola jeedaa waxaa laga yaabaa inaad haysato xalal lagu heli karo sharciyada kale ee isbarbar socda kuwa laga heli karo IDEA, laakiin guud ahaan, si aad u hesho gargaar sida ku cad sharciyadaas kale, waa inaad marka hore isticmaashaa xalaka la heli karo ee maamulka ee hoos yimaada IDEA (yacnii, cabashada hannaanka xaqsoorka; hannaanka xallinta, oo ay ku jiraan kulanka xallinta, iyo nidaamyada dhageysiga xaqsoorka ee eex la'aanta ah) kahor intaan maxkamadda toos loo aadin.

## KHIDMADAHA QAREENKA

**Guud**

Tallaba ama dacwad kasta oo la hoos keeno Qeybta B ee IDEA, maxkamadda, ikhtiyaarkeeda, ayay ku abaalmarin karta
khidmada qareeno macquul ah oo qeyb ka ah kharashaadka adiga, haddii aad guulaysato (guulaysato).

Tallaba ama dacwad kasta oo la hoos keeno Qeybta B ee IDEA, maxkamadda, ikhtiyaarkeeda, waxay ku abaalmarin kartaa khidmado macquul ah qareenka iyagoo qeyb ka ah kharashyada hay'ada Waxbarashada Gobolka ama dugsiga degmada, si uu u bixiyo qareenkaaga, haddii qareenka: (a) uu gudbiyay cabasho ama dacwad maxkamadeed oo maxkamada ku ogaato inay

tahay mid aan macno lahayn, aan macquul ahayn, ama aan sal lahayn; ama (b) sii waday dacwadda kadib markii dacwadda si cad u noqotay mid aan macno lahayn, aan aan macquul ahayn, ama aan sal lahayn; **ama**

Tallaabo ama dacwad kasta oo la hoos keeno Qeybta B ee IDEA, maxkamaddu, iyada ikhtiyaarkeeda, waxay ku abaalmarin kartaa khidmada qareenada ee macquul ah taas oo qeyb ka ah kharashaadka Hay'ada Waxbarashada Gobolka ama dugsiga degmada, si aad adiga ama qareenkaaga u bixiyo , haddii codsigaaga dhageysiga hannaanka xaqsoorka ama dacwad dambe oo maxkamadeed loo soo bandhigay ujeedo kasta oo aan habboonayn, sida in la dhibaateeyo, in la keeno dib u dhac aan loo baahnayn, ama si aan loo baahnayn loo kordhiyo qiimaha falka ama dacwadda.

**Abaalmarinta khidmadaha ah**

Maxkamaddu waxay ku abaalmarisaa khidmado qareennada macquulka ah sida soo socota:

1. Khidmada waa inay ku saleysnaataa qiimayaasha ka jira bulshada dhexdeeda taas oo ficilka ama dacwaddu ka bilaabmatay nooca iyo tayada adeegyada la bixiyo. Lama isticmaali karo gunno ama badiye marka la xisaabaayo khidmadaha la bixiyo.
2. Khidmadaha qareenka lama siin karo kharashyada la xiriirana dib looma siin doono ficil kasta ama dacwad kasta sida ku cad Qeybta B ee IDEA adeegyada la qabtay kadib markii laguu soo bandhigay dalab dejin ah in lagu adiga laguu sameeyay haddii:
   a. Soo jeedinta lagu sameeyo wakhtiga ku qeexan Xeerka 68aad ee Xeerarka Federaalka ee Nidaamka Madaniga ama, haddii ay dhacdo dhageysiga hannaanka xaqsoorka, mar kasta in ka badan 10 maalmood oo kalendharka ah kahor intaan dacwaddu bilaaban;
   **b.** Soo jeedinta aan lagu aqbalin 10 maalmood oo kalendharka ah gudahood; **iyo**
   c. Maxkamadda ama sarkaalka maamulka dhegaysiga ay ogaato in gargaarka ugu dambeeyay ee aad heshay uusan kaaga wanaagsaneyn dalabka dejinta.

   In kasta oo ay jiraan xannibaadahaan, abaalmarinta khidmadaha qareennada iyo kharashaadka la xiriira ayaa laguu sameyn karaa
   haddii aad guulaysato oo aad si weyn xaq ugu leedahay diidmada dalabka dejinta.
3. Khidmada lama bixin karo oo la xiriirta kulan kasta oo ka mid ah Kooxda Barnaamijka Waxbarashada Shakhsiyeed (IEP) marka laga reebo haddii kulanka aan lagu qaban natiijada Ka timid dacwada maamulka ama tallaabo maxkamadeed. Khidmadaha sidoo kale waxaa laga yaabaa inaan lagu bixin dhexdhexaadin sida lagu tilmaamay hoosta cinwaanka ***Dhexdhexaadinta***.

   Kulanka xallinta, sida lagu sharraxay cinwaanka ***Hannaanka Xallinta***, looma tixgelinaayo kulan la isugu yeeray natiijada dhageysiga maamulka ama tallaabo maxkamadeed, iyo sidoo kale looma tixgelinaayo dhageysiga maamulka ama ficil maxkamadeed oo loogu

   talagalay ujeeddooyinka qodobbada khidmadaha qareennada.

Maxkamadda waxay yareysaa, sida ku habboon, qaddarka khidmadaha qareennada ee lagu bixiyo Qeybta B ee IDEA, haddii maxkamadda ogaato in:

1. Adiga, ama qareenkaaga, inta lagu guda jiro tallabada ama dacwadda, si aan macquul ahayn u daahisay xallinta kama dambeysta ah ee khilaafka;
2. Qadarka khidmadaha qareennada ee haddii kale loo oggol yahay in lagu abaal mariyo ay si xad-dhaafka ah ugu badan tahay heerka saacadda ee ka jira bulshada adeegyada la midka ah ee qareennada leh xirfada isku midka ah, sumcada, iyo waayo-aragnimada;
3. Waqtiga la qaatay iyo adeegyada sharciga ee la bixiyey ay ahaayeen kuwo xad-dhaaf ah iyadoo la tixgelinayo nooca ficilka ama dacwadda; **ama**
4. Qareenka ku matalaaya uusan siinin dugsiga degmada macluumaadka ku habboon ogeysiiska codsiga dhageysiga xaqsoorka sida lagu sharaxay hoosta cinwaanka ***Cabashada Hannaanka Xaqsoorka*.**

Si kastaba ha noqotee, maxkamada ma yarayn karto khidmadaha haddii maxkamada ogaato in gobolka ama dugsiga degmada ay si aan macquul ahayn u daahiyeen xallinta kama dambeysta ah ee ficilka ama dacwadda ama ay jirto xad-gudub iyadoo la raacaayo qodobbada ilaalinta nidaamka ee Qeybta B ee IDEA.

# NIDAAMYADA MARKA LA EDBINAAYO CARRUURTA NAAFADA AH

## AWOODA SHAQAALAHA DUGSIGA

### Go'aaminta dacwad-hadba-dacwad

Shaqaalaha dugsiga waxay u tixgelin karaan xaalad kasta oo gaar ah iyada oo loo eegayo gundhiga dacwad-hadba-dacwad, marka la go'aaminayo haddii ay tahay beddelka meelaynta, oo loo sameeyey si waafaqsan shuruudaha soo socda ee la xiriira edbinta, ay ku habboon tahay canuga naafada ah ee ku xadgudba xeerka dugsiga ee anshaxa ardayga.

### Guud

Ilaa xadka ay iyaguna tallaabo noocaas ah u qaadaan carruurta aan naafada ahayn, shaqaalaha dugsiga ayaa laga yaabaa, muda aan ka badnayn **10 oo maalmaha dugsi ah** oo isku xigxiga, kasaar canug naafada ah ee ku xadgudba xeerka anshaxa ardayga meelayntooda hadda ilaa goob waxbarasho ku meelgaar ah oo ku habboon, goob kale, ama hakinta. Shaqaalaha dugsiga waxay kaloo saari karaan ka saarid dheeraad ah cunugga muddo aan ka badneyn **10 maalmaha dugsiga ah** oo isku xiga isla sannad dugsiyeedkaas xagga dhacdooyinka gaarka ah ee ku saabsan anshax xumada, illaa inta ka saaridaas waa in aysan ahayn isbaddal lagu sameeyo meeleynta (eeg ciwaanka ***Beddelka Meelaynta Sababta Ka saaritaannada Anshaxa*** ee qeexitaanka).

Marka canuga naafada ah laga saaro meelaynta ay hadda ku jiraan wadar ahaan **10 maalmood oo dugsiga ah** isla sannad-dugsiyeedka, waa in dugsiga degmada, inta lagu jiro maalmaha ku xiga ee kasaaridda sannad-dugsiyeedkaas, ay u fidisaa adeegyo illaa xadka looga baahanyahay hoosta cinwaan-hoosaadka ***Adeegyada***.

**Awood dheeraad ah**

Haddii habdhaqanka ku xadgudbay xeerka anshaxa ardayga uusan ahayn muujinta naafonimada canuga (fiiri cinwaanka-hoosaadka ***Go'aanka Muujinta***) iyo beddelka edbinta meelayntu ay dhaafi doonto **10 maalmood oo dugsi ah** oo isku xigxiga, shaqaalaha dugsiga waxay codsan karaan nidaamyada edbinta canugaas naafada ah si la mid ah iyo isla mudadaas oo kale oo uu siin doono carruurta aan naafada ahayn, marka laga reebo in dugsigu bixiyo adeegyada canugaas sida hoos ku qeexan hoosta **Adeegyada**. Kooxda IEP-ga canuga ayaa go'aamisa goob waxbarasho kale oo ku-meelgaar ah oo loogu talagalay adeegyada noocaas ah.

## ADEEGYADA

Dugsiga degmada waxaa kaliya oo looga baahanyahay inay adeegyo siiso canug naafo ah oo laga saaray meelayntooda hadda mudda 10 maalmaha dugsiga ah ama ka yar sanad dugsiyeedkaas dhexdiisa,, haddii ay adeegyo siiso canug aan naafo ahayn oo si lamid ah looga saaray. Adeegyada ay tahay in la siiyo canug naafo ah oo laga saaray meelaynta hadda ee canuga waxaa laga yaabaa in lagu siiyo goob kale oo waxbarasho oo ku meelgaar ah.

Canug naafada ah oo laga saaray meelaynta canuga ee hadda **in ka badan 10 oo maalmaha dugsiga ah** oo habdhaqanka ma aha mid muujinaya naafonimada canuga (eeg cinwaan-hoosaadka, ***Go'aanka muujinta***) ama kaas oo looga saaray xaalada gaar ah (eeg cinwaan-hoosaadka, ***Xaaladaha gaar ah***) waxaa waajib ku ah in uu:

1. Sii wado helitaanka adeegyada waxbarashada (uu heli karo waxbarashada dadweynaha oo habboon oo bilaashka ah), si loogu suurtogeliyo canuga in uu sii wado kaqeybgalka manhajka waxbarashada guud, in kasta oo ay ku jirto goob kale (taasi waxay noqon kartaa goob kale oo waxbarasho oo ku meelgaar ah), iyo si ay horumar ugu gaaraan gaarista hadafyada lagu qeexay IEP-ga canuga; **<u>iyo</u>**
2. Helaa, sida ku habboon, qiimeynta habdhaqanka shaqeynaya, iyo adeegyada wax kaqabashada habdhaqanka iyo wax ka beddelka, kuwaas oo loogu talagalay inay wax ka qabtaan xadgudubka habdhaqanka si aysan mar dambe u dhicin.

Kadib marka canug naafo ah laga saaro meelaynta ay hadda ku jiraan muda **10 oo maalmaha dugsiga ah** isla sannad dugsiyeedkaas, iyo **<u>haddii</u>** ka saarista hadda ay tahay 10 oo maalmaha dugsiga ah oo isku xigta ama ka yar **<u>iyo</u>** haddii ka saaristu aysan ahayn beddelka meelaynta (eeg qeexitaanka hoose), **<u>markaa</u>** shaqaalaha dugsiga, iyagoo la tashanaya ugu yaraan mid ka mid ah macallimiinta canuga, inay go'aamiyaan xadka adeegyada loo baahanyahay si loogu suurtogeliyo canuga inuu sii wato kaqeybgalka manhajka waxbarashada guud, in kasta oo ay ku jirto goob kale, iyo in loo sii hormariyo sidii loo gaari lahaa hadafyada lagu sheegay IEP-ga canuga.

Haddii ka saaristu ay tahay beddelka meelaynta (eeg cinwaanka, ***Beddelka Meelaynta Sababta Ka saaritaannada Anshaxa***), Kooxda IEP ee canuga ayaa go'aamisa adeegyada ku habboon si ay canugu ugu suurtogasho inuu ka sii qeybqaato manhajka waxbarashada guud, in kasta oo ay ku jirto goob kale (taasi waxay noqon kartaa goob kale waxbarasho oo ku meelgaar ah), iyo in loo sii hormariyo sidii loo gaari lahaa
hadafyada lagu sheegay IEP-ga canuga.

**10 maalmood oo maalmaha dugsiga** ah gudahooda go'aan kasta oo lagu beddelayo meelaynta canug naafada ah sababtuna tahay ku xadgudubka xeerka anshaxa ardayga (marka laga reebo kasaaritaan kaas oo ah **10 maalmood oo maalmaha dugsiga** ah oo isdaba yaalo ama ka yar oo aan ahayn beddelka meelaynta), tdugsiga degmada, adiga, iyo xubnaha kale ee Kooxda ee khuseeya IEP (sida adiga iyo dugsiga degmada ad go'aamiseen) waa inay dib u eegaan dhammaan macluumaadka khuseeya ee ku jira faylka ardayga, ioo ay ka mid yihiin IEP-ga canuga, baaritaan kasta ee macallin, iyo macluumaad kasta oo khuseeya oo aad adigu bixisay si loo go'aamiyo:

1. Haddii anshaxa kujira su'aasha uu sababay, ama xiriir toos ah oo la taaban karo la leeyahay,
   naafonimada canuga; **ama**
2. Haddii anshaxa kujira su'aashu ay tahay natiijada tooska ah ee ku guuldaraysiga dugsiga degmada in ay
   fuliyaan IEP-ga canuga.

Haddii dugsiga degmada, adiga, iyo xubnaha kale ee khuseeya Kooxda IEP-ga canuga ay go'aamiyaan in mid ka mid ah qawaaniintaas la buuxiyey, anshaxa waa in lagu go'aamiyaa in uu yahay muujinta naafonimada canuga.

Haddii dugsiga degmada, adiga, iyo xubnaha kale ee khuseeya Kooxda IEP-ga canuga ay go'aamiyaan in anshaxa su'aasha kujira in uu yahay natiijada tooska ah ee ku guuldaraysiga dugsiga degmada in ay hirgeliso IEP, dugsiga degmada waa inay qaaddaa tallaabo degdeg ah si loo saxo cilladahaas.

**Go'aaminta in dabeecaddaas ay ahayd muujinta naafonimada canuga**

Haddii dugsiga degmada, adiga, iyo xubnaha kale ee khuseeya Kooxda IEP-ga ay go'aamiyaan in dhaqanku uu ahaa muujinta naafonimada canuga, Kooxda IEP waa inay midkood:

1. Samee qiimeynta habdhaqanka oo shaqaynaysa, haddii aysan dugsiga degmada ay samaysay qiimeynta habdhaqanka oo shaqaynaysa kahor intaan habdhaqankii keenay isbeddelka meelaynta dhicin, iyo hirgelinta qorshaha wax kaqabashada habdhaqanka ee loogu talagalay canuga; **ama**
2. Haddii qorshaha wax kaqabashada habdhaqanka mar hore la sameeyay, dib u eeg qorshaha wax kaqabashada habdhaqanka, oo wax ka beddel, haddii loo baahdo, si wax looga qabto habdhaqanka.

Marka laga reebo sida lagu sharxay hoosta cinwaanka hoosaadka ***Xaaladaha gaar ah***, dugsiga degmada waa inay ku soo celisaa canugaaga meelaynta taas oo canugaaga laga saaray, haddii laga reebo marka adiga iyo degmada ku heshiisaan beddelka meelaynta taas oo qeyb ka ah wax ka beddelka qorshaha wax kaqabashada habdhaqanka.

**Xaaladaha gaarka ah**

Ha ahaato ama aysan ahaan dabeecadda waxay ahayd muujinta naafonimada canugaaga, shaqaalaha dugsiga ayaa laga yaabaa inay ka saaraan arday goob waxbarasho kale oo kumeelgaar ah (oo ay go'aamiyeen Kooxda IEP-ga canuga) ilaa 45 maalmood oo dugsi, haddii canugaaga:

1. Hub u qaato (eeg qeexitaanka hoose) dugsiga ama hub ku haysto dugsiga, dhismaha dugsiga, ama hawl dugsi oo hoos imanaysa awoodda SEA ama dugsiga degmada;
2. 2. Si ulakac ah u haysto ama u isticmaalo maandooriyaaal sharci darro ah (eeg qeexitaanka hoose) ama iibiya ama codsaday iibinta daroogada la xakameyo (eeg qeexidda hoose), inta la joogo dugsiga, dhismaha dugsiga, ama hawl dugsi oo hoos timaada awoodda SEA ama dugsiga degmada; **ama**
3. U geystay dhaawac jireed oo halis ah (eeg qeexitaanka hoose) qof kale intii la joogay dugsiga, dhismaha dugsiga, ama hawl dugsi oo hoos imanaysay awoodda SEA ama dugsiga degmada.

**Qeexitaanada**

*Daroogada la xakameyo* waxaa loola jeedaa waa maandooriye ama darooga kale oo lagu aqoonsaday sida waafaqsan jadwalada I, II, III, IV, ama V qeybta 202(c) ee Xeerka Daroogada la Xakameeyay (21 U.S.C. 812(c)).

*Maandooriyaha sharci darrada ah* waxaa loola jeedaa daroogada la xakameyo; laakiin kuma jiraan daroogada la xakameyo taas oo si sharci ah loo haysto ama loo isticmaalo iyada oo uu kormeeraayo xirfadle daryeel caafimaad oo ruqsadeysan ama si sharci ah loo haysto ama taas oo loo adeegsado maamul kasta oo hoos yimaada Xeerkaas ama wax kasta oo kale oo ka mid ah qodobada sharciga federaalka.

*Dhaawaca jirka ee halista ah* wuxuu leeyahay macnaha la siiyay erayga ''dhaawac jireed oo halis ah'' ee ku xusan baaragaraafka/farqadda
(3) ee qeyb hoosaadka (h) ee qeybta 1365 ee cinwaanka 18, Xeerka Maraykanka..

*Hubka* wuxuu leeyahay macnaha la siiyay ereyga ''hub khatar ah'' sida ku cad faqradda (2) ee qeyb-hoosadka koowaad (g) ee qeybta 930 ee cinwaanka 18, Xeerka Mareykanka.

**Ogeysiiska**

Taariikhda ay sameyso go'aanka ah in la sameeyo saaritaan taas oo ah beddelka meelaynta canugaaga sababta oo ah ku xadgudubka xeerka anshaxa ardayga, waxaa waajib ah in dugsiga degmada ku ogeysiiyaan go'aankaas, oo ayna ku siiyaan ogeysiiska ilaalinta nidaamka.

## BEDDELKA MEELAYNTA KA SAARIDA EDBINTA SABABTEEDA

Ka saarida canugaaga naafada ah meelaynta waxbarashada hadda ee canugaaga waa **beddelka meelaynta** haddii:

1. ka saarista ay ka badan tahay 10 maalmood oo dugsiga ah oo isku xiga; **ama**
2. Ilmahaaga lagu sameeyay ka saaritaano taxana ah taas oo ka dhigan qaab sababtoo ah:
   a. Ka saaritaanada taxanaha ah waxay wadar ahaan ka badan yihiin 10 maalmood oo dugsiyeed sannad-dugsiyeedka dhexdiisa;
   b. Habdhaqanka canuga waxay si aad ah ula mid tahay dhacdooyinka habdhaqankii hore kaas oo keenay taxanayaasha ka saarida;
   c. Waa arrimo dheeraad ah sida dhererka ka saarid kasta, wadarta waqtiga canugaaga laga saaray, iyo isku dhawaanshaha ka saaritaannada midba midka

kale.

Haddii qaabka kasaaritaanka uu ka dhigan yahay beddelka meelaynta waxaa lagu go'aamiyaa gundhiga dacwad-ilaa-dacwad ee dugsiga degmada iyo, haddii lagu xujeeyo, waxay ku xiran tahay dib u eegista iyada oo loo marayo hannaanka xaqsoorka iyo dacwadaha garsoorka.

## GO'AANSASHADA GOOBTA

Kooxda barnaamijka waxbarashada shaqsiyeed (IEP) ayaa go'aamisa goobta kale waxbarashada ku-meelgaar ah oo loogu talagalay ka saaritaannada kuwaas oo ah **beddelka meelaynta**, sida ku cad cinwaan-hoosaadka ***Awooda dheeraadka ah iyo xaaladaha gaar ah***.

## RACFAAN

### Guud

Waxaad codsan kartaa dhageysiga xaqsoorka (eeg cinwaanka ***Nidaamka Cabashada Xaqsoorka***) haddii aadan ku raacsaneyn:

**1.** Go'aan kasta oo ku saabsan meelaynta lagu sameeyay sida ku cad qodobadaan edbinta; **ama**

2. Go'aanka muujinta ee kor lagu sharaxay.

Dugsiga degmada waxay codsan kartaa cabashada xaqsoorka (kor ka eeg) haddii ay rumaysan tahay in u daayitaanka meelaynta canuga ee hadda jirta ay si weyn ugu badan tahay inay dhaawac u keento canugaaga ama kuwa kale.

### Awoodda sarkaalka dhageysiga

Sarkaalka dhageysiga ee buuxiya shuruudaha lagu sharaxay hoosta cinwaan-hoosaha ee sarkaalka **dhageysiga eex la'aanta ah** waxaa waajib ku ah inuu sameeyaa dhageysiga xaqsoorka oo uu go'aan gaaraa. Sarkaalka dhageysigu wuxuu:

**1.** Ku soo celin karaa canugaaga naafada ah meelaynta taas oo canugaaga laga saaray haddii sarkaalka dhageysigu go'aamiyo in ka saaristu ay ahayd ku xadgudubka qawaaniinta lagu sharaxay hoosta cinwaanka ***Maamulka Shaqaalaha Dugsiga***, ama in habdhaqanka canugaaga u ahaa muujinta naafonimada canuga; **ama**

2. Amri karaa beddelka meeleynta canugaaga naafada ah goobta kale ee ku habboon ee waxbarashada kumeelgaar ah oo aan ka badneyn 45 oo maalmaha dugsiga ah haddii sarkaalka dhageysigu go'aamiyo in u daayitaanka meelaynta hadda ee canugaaga ay si weyn ugu badan tahay inay u keento dhaawac canugaaga ama kuwa kale.

Nidaamyadaan dhageysiga waa la soo celin karaa, haddii dugsiga degmada aaminsan tahay in ku soo celinta canugaaga meelayntii asalka ahayd ay si weyn ugu badan tahay inay dhaawac u keento canugaaga ama kuwa kale.

Mar kasta oo adiga ama dugsiga degmada aad xareysato cabashada xaqsoorka si aad u codsato dhageysi noocan oo kale ah, waa in la qabtaa dhageysi buuxiya qawaaniinta lagu sharaxay hoosta cinwaanada ***Nidaamyada Cabashada Xaqsoorka iyo Dhageysiga***

***Cabashooyinka Xaqsoorka***, marka laga reebo sida soo socota:

1. SEA ama dugsiga degmada waxaa waajib ku ah inay diyaariyaan dhageysi xaqsoor oo degdeg ah, taas oo waajib ay tahay inay ku dhacdo **20** maalmaha dugsiga gudahooda laga bilaabo taariikhda dhageysiga la codsaday waana inay keentaa go'aan **10** maalmaha dugsiga ah gudahooda dhageysiga kadib.
2. Marka laga reebo haddii adiga iyo dugsiga degmada qoraal ahaan aadan ku heshiinin inaad ka tanaasusho kulanka, ama aad ku heshiin weydaan dhexdhexaadin, kulanka xallinta waa inuu ku dhacaa **toddoba** maalmood oo kalendharka ah gudahood marka la helo ogeysiiska cabashada xaqsoorka. Dhagaysiga wuu sii socon karaa marka laga reebo haddii arrinta lagu xaliyo qancinta labada xisbi/dhinac **15** maalmood oo kalendharka ah gudahood marka la helo cabashada hannaanka xaqsoorka.

Adiga ama dugsiga degmada waxaad rafcaan ka qaadan kartaan go'aanka dhageysiga hannaanka xaqsoorka oo la dadajiyey si la mid ah go'aammada dhageysiyada kale ee xaqsoorka (eeg cinwaanka **Racfaan**).

## MEELAYNTA XILIGA RAFCAANKA LAGU JIRO

Marka, sida kor lagu sharraxay, adiga ama degmada dugsiga ayaa xareystay/buuxsaday nidaamka xuquuq dhawrista cabashada oo la xiriirta arrimaha edbinta, waa in canugaaga (ilaa mooyee adiga iyo ODE ama degmada dugsiga aad si kale ku heshiin weydaan) ku sugnaado goobta waxbarashada ee kumeelgaar ah oo kale inta laga gaarayo go'aanka sarkaalka dhageysiga dacwada. ama ilaa ay ka dhaceyso wakhtiga mudada ka saarista sida lagu sheegay oona lagu sharraxay hoosta cinwaanka ***Maamulka Shaqaalaha Dugsiga***, hadba kii hor dhaca.

## ILAALINTA CARRUURTA AAN WELI U QALMIN WAXBARASHADA GAARKA IYO ADEEGYADA LA XIRIIRA

### Guud

Haddii canugaaga aan la go'aamin inuu u qalmo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira oo uuna ku xadgudbo xeerka anshaxa ardayga, laakiin degmada dugsiga waxay ogeyd (sida hoos lagu go'aamiyey) kahor intaan dhaqankii keenay wax ku saabsan ficilka edbintu dhicin, in canugu ahaa canug naafo ah, markaa canugaaga wuxuu cadeyn karaa mid kasta oo ka mid ah difaacyada lagu tilmaamay ogeysiiskan.

### Gundhiga aqoonta ee loogu talagalay arrimaha edbinta

Degmada dugsiga ayaa loo tixgelin doonaa inay aqoon u leehayd in canugaaga yahay canug naafo ah haddii, ka hor intaan dhaqanka keenay wax ku saabsan ficilka edbintu dhicin:

1. Waxaad walaac qoraal ahaan ugu muujisay shaqaalaha kormeeraha ama maamulka hay'ada habboon ee waxbarashada, ama canugaaga macallinkiisa in canugaaga u baahanyahay waxbarashada gaar ah iyo adeegyada la xiriira;
2. Waxaad codsatay qiimeynta la xiriirta u qalmitaanka waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira sida waafaqsan Qeybta B ee IDEA; **ama**
3. Canugaaga macallinkiisa ama shaqaalaha kale ee degmada dugsiga ayaa muujiyay

walaacyo gaar ah oo ku saabsan qaabka dabeecadda ee uu canugaaga si toos ah ugu muujiyey agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee degmada dugsiga ama shaqaalaha kale ee kormeerka ee dugsiga degmada.

**Marka laga reebo**

Degmada dugsiga looma tixgelin doono inay leedahay aqoonta noocaas ah haddii:

1. Aadan oggolaanin qiimeynta ilmaha ama aad diidday adeegyada waxbarashada gaarka ah; **ama**
2. Canugaaga la qiimeeyay oo la go'aamiyay in uusan ahayn canug naafo ah marka la eego Qeybta B ee IDEA.

**Xaaladaha quseeya haddii aysan jirin gundhig aqooneed**

Haddii kahor qaadista tallaabooyinka edbinta ee ka dhanka ah canugaaga, degmada dugsiga aysan aqoon u lahayn in canugaaga yahay canug naafo ah, sida kor lagu sharaxay hoosta cinwaan-hoosaadka ***Gundhiga aqoonta ee loogu talagalay arrimaha edbinta iyo Kareebitaanka***, canugaaga waxaa laga yaabaa in la mariyo tallaabooyinka edbinta ee khuseeya carruurta aan naafada ahayn ee ku dhaqmo dabeecadaha la isku barbara dhigi karo.

Si kastaba ha noqotee, haddii codsi loo sameeyo qiimeynta canugaaga muddada waqtiga ee canugaaga la marinaayo tallaabooyinka edbinta, qiimeynta waa in loo sameeyaa si degdeg ah.

Ilaa qiimaynta laga dhammaystiro, canugaaga wuxuu ku sii jiri doonaa meelaynta waxbarashada oo ay go'aamiyeen maamulka dugsigu, taas oo ay ku jiri karto hakinta ama cayrinta adeegyada waxbarashada la'aanta ah.

Haddii canugu loo go'aamiyo inuu yahay canug naafo ah, iyadoo la tixgelinaayo macluumaadka ka yimaada qiimeynta ay sameysay degmada dugsiga, iyo macluumaadka aad bixisay, degmada dugsiga waa inay bixisaa waxbarashada gaar ah iyo adeegyada la xiriira si waafaqsan Qeybta B ee IDEA, oo ay ku jiraan shuruudaha edbinta ee kor lagu sharaxay.

## U GUDBINTA IYO WAXKAQABASHADA EE FULINTA SHARCIGA IYO MAAMULKA GARSOORKA

Qeybta B ee IDEA kama:

1. Mamnuuceyso hay'ad inay ku soo wargeliso dembi uu galay canug naafo ah mas'uuliyiinta ku habboon; **ama**
2. Hor istaageyso hirgelinta sharciga gobolka iyo hay'ada garsoorka inay gutaan waajibaadkooda marka loo eego ku dhaqanka sharciga federaalka iyo gobolka kadhanka ah dembiyada uu galay canug naafo ah.

**Gudbinta diiwaanada**

Haddii degmada dugsiga ay soo wargeliso dembi uu galay canug naafo ah, degmada dugsiga:

1. Waa inuu hubiyaa in nuqulada waxbarashada gaarka ah ee canuga iyo diiwaanka edbinta loo gudbiyo si ay u tixgeliyaan mas'uuliyiinta ay hay'addu u soo wargeliso dembiga; **ama**

2. Waxaa laga yaabaa inay Soo gudbiso nuqulada waxbarashada gaarka ah ee canuga iyo diiwaanada edbinta oo kaliya
ilaa xadka uu oggolaaday Xeerka Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qarsoodinida (FERPA).

# SHURUUDAHA MEELEYNTA HALKA DHINAC AH EE WAALIDIINTA HAYSTA CARUURTA DHIGATA DUGSIYADA GAARKA AH OO KUDHIGTA

## GUUD

Qeybta B ee IDEA uma baahna dugsiga degmada inay bixiso kharashka waxbarashada, oo ay ku jiraan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xiriira, ee canugaaga naafada ah ee dhigta dugsi gaar ah ama xarun haddii degmada dugsiga ay sameysay waxbarashada bilaashka ah ee habboon ee dadweynaha (FAPE) oo canugaagana uu heli karo oo aadna dooratay inaad canugaaga geyso dugsi gaar ah ama xarun. Si kastaba ha noqotee, degmada dugsiga uu ku yaallo dugsiga gaarka loo leeyahay waa inuu ku daraa ilmahaaga dadka baahiyaha uu qabo lagu daboolay sida ku cad qodobbada Qeybta B ee khuseeya carruurta ay waalidkooda geeyeen dugsi gaar ah sida ku cad 34 CFR §§ 300.131 ilaa 300.144.

**Magdhawga meelaynta ee loogu talagalay dugsiga gaarka ah**

Haddii canugaaga hore uu u helay waxbarasho gaar ah iyo adeegyada la xiriira oo hoos imanaya maamulka dugsiga degmada, oo aad dooratay inaad canugaaga ka diiwaangaliso dugsiga xanaanada ee gaarka ah, dugsiga hoose, ama dugsiga sare adiga oo an oggolaansho ka haysanin ama gudbin degmada dugsiga, maxkamadda ama sarkaalka dhagaeysiga dacwada ayaa laga yaabaa inuu ugu baahdo wakaaladda inay magdhaw kabixiso kharashka diiwaangelintaas haddii maxkamadda ama sarkaalka dhegaysiga ay ogaadaan in hay'addu aysan sameynin waxbarashada bilaashka ah ee habboon ee dadweynaha (FAPE) oo uu heli karo canugaaga qaab waqti habboon kahor diiwaangelintaas iyo in meelayntaas gaarka ah ay habboon tahay. Sarkaalka dhageysiga dacwada ama maxkamadda waxay u arki kartaa meelayntaada inay habboon tahay, xitaa haddii meelayntu aanay buuxin heerarka gobolka ee khuseeya waxbarashada ay bixiyaan SEA iyo degmada dugsiga.

**Xadididda magdhawga**

Kharashka magdhawga ee lagu qeexay baaragaraafka kore waa la yarayn karaa ama la dafiri karaa:

1. Hadii: (a) Kulankii ugu dambeeyay ee barnaamijka waxbarashada shaqsiyeedka (IEP) ee aad tagtay kahor intaan canugaaga laga saarin dugsiga dadweynaha, ma aadan ogeysiin Kooxda IEP in aad diidan tahay meeleynta ay soo jeedisay degmada dugsiga si ay FAPE u siiso canugaaga, oo ay ka mid tahay sheegidda walaacaaga iyo ujeedkaaga aad canugaaga ugu diiwaangalineyso dugsi gaar ah oo aad kudhigato kharashka dadweynaha ah; ama (b) Ugu yaraan 10 maalmood oo shaqo ah (oo ay ku jiraan fasax kasta oo dhaca maalin shaqo) kahor intaan canugaaga laga saarin dugsiga dadweynaha, ma aadan siinin ogeysiis qoraal ah degmada dugsiga ee macluumaadkaas ku aadan;
2. Haddii, kahor intaan canugaaga laga saarin dugsiga dadweynaha, degmada dugsiga

waxay adiga ku siisay ogaysiis hore oo qoraal ah ujeeddadiisuna tahay inay qiimeyso canugaaga (oo ay ku jiraan bayaanka ujeeddada qiimeynta taas oo ku habboon oona macquul ah), laakiin ma aadan ka dhigin canuga mid diyaar u ah qiimeynta; **ama**

3. Markay maxkamadda ogaato in falalkaagu ahaayeen kuwo

aan macquul ahayn. Si kastaba ha noqotee, kharashka magdhawga

**1.** Waa inaan la yareynin ama la dafirin ku guuldareysiga bixinta ogeysiiska haddii: (a) Dugsigu kaa hor istaagay inaad bixiso ogeysiiska; (b) Ma aadan helin ogaysiis mas'uuliyaddaada inaad bixiso ogeysiiska kor lagu sharaxay; ama (c) U hoggaansanaanta shuruudaha kore waxay u badan tahay inay canugaaga u geysato dhaawac jireed; **iyo**

2. Waxaa laga yaabaa, in go'aanka maxkamadda ama sarkaalka dhageysiga dacwada, aan la yareynin ama la dafirin kuguuldareysigaaga inaad bixiso ogeysiiska loo baahnaa haddii: (a) Ma tihid aqoonyahan ama maku qori kartid af Ingiriiska; ama (b) U hoggaansanaanta shuruudda kor ku xusan waxay u badantahay inay canugaaga u keento dhaawac dhinaca dareenka ah.